- cudur ama naafanimo sii xumaanaysa;
- Wixii xaalado ama xanuuno ah ee adag ama murugsan oo u baahan inuu daweyo khabiir.

Haddii aadan naga helin ogolaansho hore marka loo baahdo, biilka waxaa laga yaabaa inaan annagu bixin. Wixii macluumaad ah, Adeegga Macaamiisha ka wac lambarka talefoonka ee ku daabacan xagga hoose ee boggan.

## D3. Marka adeeg-bixiyaha uu ka tago qorshahayaga

Adeeg-bixiyaha ku jira shabakadda ee aad isticmaasho ayaa laga yaabaa inuu ka tago qorshahayaga. Haddii mid ka mid ah adeeg-bixiyayaashaada uu ka tago qorshahayaga, waxaad leedahay xuquuq iyo ilaalin gaar ah oo lagu soo koobay hoos:

- Xitaa haddii shabakadayada adeeg bixiyayaasha isbedelaan sanadka dhexdiisa, waa inaan



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

ku siinaa si aan kala go' lahayn oo aad u hesho adeeg-bixiyeyaal xirfadleh.

- Waxaan ku ogaysiin doonaa in adeeg-bixiyahaagu uu ka tagayo qorshahayaga si aad wakhti u heshid si aad u doorato adeeg-bixiye cusub.
  - Haddii daryeelkaaga aasaasiga ah ama bixiyaha caafimaadka habdhaqanka uu ka tago qorshahayaga, waanu ku soo wargelin doonaa haddii aad aragtay adeeg-bixiyahaas saddexdii sano ee la soo dhaafay.
  - Haddii mid ka mid ah adeeg-bixiyayaashaada kale uu ka tago qorshahayaga, waan ku ogeysiin doonaa haddii lagu qoondeeyay adeeg-bixiyaha, hadda aad ka hesho daryeel, ama aad aragtay saddexdii bilood ee la soo dhaafay.
- Waxaanu kaa caawinaynaa inaad doorato adeeg-bixiye cusub oo ku jira shabakadda si aad u sii waddo maaraynta baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.
- Haddii aad hadda ku jirto daawayn ama teerabiyo uu bixinayo adeeg-bixiyahaaga hadda, waxaad xaq u leedahay inaad waydiiso, waxaan kula shaqaynaynaa sidii aad u hubin lahayd, in daawaynta ama teerabiyada lagama maarmaanka ah ee aad qaadnayso ay u sii socoto.
- Waxaan ku siin doonaa macluumaadka ku saabsan xilliyada isdiiwaangelinta ee kala duwan ee aad diyaar u tahay iyo fursadaha aad ku beddeli karto qorshooyinka.
- Haddii aanan heli karin khabiir shabakadeed oo u qalma oo aad heli karto, waa inaan kuu diyaarinnaa khabiir ku takhasusay shabakada si uu u bixiyo daryeelkaaga. khabiir ka baxsan shabakada si uu u bixiyo daryeelkaaga marka aan la helikarin bixiye ka tirsan shabakada ama uu san buuxin karin baahiyahaaga caafimaad. Waa inaad marka hore ogolaanshe naga heshaa inta aanad doonan daryeelka. Xaaladan oo kale, waxa aanu bixin doonaa daryeelkaaga sida marka aad ka qaadato daryeelaha dalada u jira oo kale.
- Haddii aad u malaynayso inaan kuu bedelin adeeg-bixiyahaagi hore u qalma ama aanaan si fiican u maamulin daryeelkaaga, waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso tayada daryeelka QIO, cabashada tayada daryeelka, ama labadaba. (Waxa aad ka eegtaa **Cutubka 9** wixii macluumaad dheeraad ah ee macluumaadka.)

Haddii aad ogaato in mid ka mid ah adeeg-bixiyayaashaada uu ka tagayo qorshahayaga, nala soo xiriir. Waxaan kaa caawin karnaa sidii aad u heli lahayd adeeg-bixiye cusub iyo maaraynta daryeelkaaga. Kala hadal Adeega Macaamiisha lambarka ku daabacan xaga hoose ee boga.

#### **D4. Adeeg-bixiyeyasha shabakada ka baxsan**

Si aad u isticmaasho dhakhtarka ama khabiir ka baxsan dalada, adiga ama PCP-gaagu waa inuu ogolaanshe hore naga helaa anaka si adeegyadaas kharashkooda loo bixiyo. Adeegyada qaar ayaa u baahan in bixiyahaagu uu anaka naga helo ogolaanshe hore. Waxa aad ka eegtaa **Cutubka 4** wixii macluumaad dheeraad ah ee macluumaadka.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Haddii aadan naga helin oggolaansho hore marka loo baahdo, biilka waxaa laga yaabaa inaan annagu bixin. Wixii malcuumaad dheeraad ah, kala hadal Adeega Macmiilka lambarka ku yaal xaga hoose ee boga.

Haddii aad isticmaasho adeeg-bixiye ka baxsan shabakad, adeeg-bixiyaha waa in uu xaq u leeyahay ka qayb qaadashada Medicare iyo/ama Kaalmada Caafimaadka.

- Ma bixin karno kharashka adeeg-bixiye aan u qalmin inuu ka qaybqaato Medicare iyo/ama Medical Assistance.
- Haddii aad isticmaalayso bixiye aan u qalmin inuu ka qayb galo Medicare, waa inaad si buuxda u bixisaa kharashka adeegyada aad heshey.
- Bixiyayaashu waa inay kuu sheegaan hadii aanad u qalmin inaad ka qayb gasho Medicare.

---

## E. Adeegyada iyo taageerada muddada-dheer (LTSS)

Adeegyada iyo taageerada muddada dheer (LTSS) waxaa weeye adeegyada ka caawiya dadka u baahan kaalmada qabashada hawlaha maalin kasta ee maydhashada, dhar xidhashada, cunto karinta, iyo qaadashada dawooyinka. Badanaa adeegyadan waxa ay kaa caawin karaan inaad joogto guriga oo markaa lagaaga baahna inaad u wareegto guri xanaanada ama isbitaal.

Marka xubintu hesho qiimaynta khatarta caafimaadka fool ka ka fool (HRA), waa la go'aamiyaa at that time whether or not the member is in need of LTSS and if he or she meets nursing facility level of care criteria to qualify. Haddii ay sidaa tahay, isku duwaha daryeelka ayaa ka caawin doona xubinta buuxinta foomamka shuruudaha oo u diri doona xubinta shaqaalaha maaliyada ee degmada xubinta degan tahay. Kadib marka shaqaalaha maaliyadu in xubintu ay u qalantu dhaqaale ahaan, isku duwaha daryeelka xubinta ayaa u diyaarin doona LTSS wakhtigaas.

---

## F. Adeegyada caafimaadka habdhaqanka (caafimaadka maskaxda iyo cilladaha isticmaalka maandooriyaha).

UCare waxay leedahay khadka kala soocida khalkhalgelinta caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka muqaadaraadka si ay uga caawiso xubnaha su'aalo kasta oo ku saabsan sida looga helo daryeelka khabiirka caafimaadka dhimirka, khabiirka cilladda isticmaalka maandooriyaha ama bixiyeyaasha shabakad kale. Khadkayaga kala soocida waxaa laga heli karaa 8 am – 5 pm - Jimco 612-676-6533 ama 1-833-276-1185 (wicitaankan waa bilaash), TTY at 612-676-6810 or 1-800-688-2534 (wicitaankan waa bilaash) si loo taageero baahiyaha caafimaadka dhimirka ama isticmaalka muqaadaraadka ee xubnahayaga.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



Waxaad ka heli kartaa macluumaadka hadda ee ku saabsan bixiyayaasha Adeegyada Caafimaadka Dhimirka iyo Istimaalka Mukhaadaraadka adigoo isticimaalaya qaybta Find a Doctor ee [care.org/searchnetwork](https://www.care.org/searchnetwork) ama adigoo wacaya Khadka Kala soocidda Caafimaadka Dhimirka iyo Istimaalka Mukhaadaraadka 612-676-6533 or 1-833-276-1185 (wicitaankan waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaankan waa bilaash). Xubnuhu waxaa ay sidoo kale wici karaan UCare 24/7 Nurse Line 1-800-942-7858 (wicitaankan waa bilaash), TTY 1-855-307-6976 (wicitaankan waa bilaash) si looga caawiyo helitaanka macluumaadka adeeg-bixiyaha.

---

## G. Adeegyada gaadiidka

Haddii aad u baahan tahay gaadiid aad u raacdo kagana soo laabato adeegyada caafimaadka ee aanu daboolno, HealthRide ka wac 612-676-6830 ama 1-800-864-2157 (wicitaankaan waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaankaan waa bilaash). Waxaanu bixin doonaa gaadiid raaca ugu habboon oo kharash jaban. Naguma aha waajib in aanu ku siino gaadiidka aad ku tageyso Xaruntaada Caafimaadka Daryeelka Kowaad hadii ay kuu jirto wax ka badan 30 mayl gurigaaga maa hadii aad doorato bixiye khabiir ah oo u jira wax ka badan 60 mayl gurigaaga. Adeegga Macmiilka ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wicitaanka waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaanka waa bilaash) haddii aanad lahayn Rugta daryeelka aasaasiga ah oo laga heli karo meel 30 mayl u jirta gurigaaga iyo/ama haddii ay kuu jirto wax ka badan 60 mayl adeeg-bixiyahaaga takhasuska leh.

UCare waxay u baahan tahay ogaysiis laba maalmood oo shaqo ah marka aad ballansanayso raacitaanka si loo xaqiijiyo helitaanka adeeg bixiyaha.

---

## H. Adeegyada la daboolay marka ay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah, marka si degdeg ah loogu baahdo, ama marka ay musiibo jirto

### H1. Daryeelka xaalad caafimaad oo degdeg ah

Gurmadka degdega caafimaadku waxaa weeye xaalad caafimaad oo leh astaamo sida damqasho badan ama dhaawac daran. Xaaladu aad ayay u daran tahay, hadii aanad u helin daryeel caafimaad oo degdega ah, adiga ama qofka hel aqoonta yar ee caafimaadka iyo dawadu waxa aad ku filan kartaan natiijada:

- khatar weyn oo caafimaadkaaga ama tan ilmaha; uurka ku jira; **ama**
- khatarta wayn ku leh shaqada jidhkaaga; **ama**
- cillad daran oo ah xubin ama qayb kasta oo jirka ah, **ama**
- Xaaladda haweeney uur leh oo fool ku jirta, marka:



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wicitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://www.ucare.org).**

- Aanu jirin wakhti ku filan oo lagugu wareejin karo cisbitaal kale ka hor dhalmada.
- U wareejinta isbitaal kale ay khatar ku keeni karto caafimaadkaaga ama badbaadadaada ama tan ilmaha uurka ku jira.

Hadii aad qabto xaalada caafimaad oo degdeg ah:

- **U helida kaalmada sida ugu dhakhsaha badan.** Wac 911 ama isticmaal qolka gurmada ama isbitaal kuugu dhow. Wac ambalaas haddii aad u baahan tahay. Uma **baahnid** ogolaansho ama gudbinta PCP-gaaga. Uma baahnid inaad adeegsato bixiye shabakad. You may get emergency medical care whenever you need it, anywhere in the U.S. or its territories from any provider with an appropriate state license.

### Adeegyada caymisku bixiyo ee xaalada caafimaadka.

Hadii aad u baahan tahay ambalaas aad ku qabato qolka gurmada degdeg ah, caymiskeena ayaa bixinaya. Waxaan sidoo kale daboolnaa adeegyada caafimaadka inta lagu jiro xaalad degdeg ah. Si aad wax badan u ogaato, tixraac Jaantuska Gunnooyinka ee **Cutubka 4** Qaybta D ee *Member Handbook*.

Adeeg-bixiyeyaasha ku siinaya daryeelka degdeg ah ayaa go'aaminaya marka xaaladaadu ay degan tahay oo ay dhamaato xaalada degdeg ah ee caafimaadka. Way sii wadi doonaan inay ku daweeyaan waxayna nala soo xidhiidhi doonaan si aan u samayno qorshayaal haddii aad u baahan tahay daryeel dabagal ah si aad u fiicnaato.

Qorshahayagu waxa uu daboolayaa daryeelkaaga dabagalka ah. Hadii aad ka heleyso daryeelkaaga xaalada degdeg ah bixiye ka baxsan dalada, waxa aanu isku dayi doonaa in aanu kuu helno daryeelayaal ku jira dalada oo ku daryeela sida ugu dhakhsaha badan.

### Helitaanka daryeelka degdeg ah haddii aanay ahayn xaalad degdeg ah

Mararka qaar waxaa adag in la ogaato hadii aad qabto xaalada degdeg ah oo caafimaadka ama caafimaadka habdhaqanka. Waxaa laga yaabaa inaad gasho daryeelka degdeg ah oo dhakhtarkana uu yiraahdo ma ahayn xaalad degdeg ah. Haddiiba aad si macquul ah u malaynaysay in caafimaadkaagu uu khatar weyn ku jirey, waxaanu daboolaynaa daryeelkaaga.

Ka dib markii uu dhakhtarku sheego in aanay ahayn xaalad degdeg ah, waxaanu daboolaynaa daryeelkaaga dheeraadka ah oo keliya haddii:

- Waxa aad isticmaashaa adeeg-bixiye shabakada ku jira, ama
- Daryeelka dheeraadka ah ee aad hesho loo tixgeliyo “daryeel degdeg loogu baahan yahay” oo waxaad raacday sharciyada helitaanka daryeelkaas. Tixraac ku sameey qaybta xigta

## H2. Daryeelka xaalada degdeg ah ee aad u baahan tahay



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Daryeelka Degdega ah ee loo baahan yahay: Daryeel aad u hesho jirro lama filaan ah, dhaawac, ama xaalad aan ahayn xaalad degdeg ah balse u baahan daryeel isla markaaba. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in aad qabtid barar xaalada jirta ama jiro aan la filalyn.

### **Daryeelka degdega ah ee looga baahan yahay goobta adeegga ee qorshahayaga**

Meelaha qaar, waan daboolnaa daryeelka sida degdega ah loogu baahanyahay kaliya haddii:

- Aad daryeelkaan ka hesho shabakada bixiyaha **aadna**
- Raacdid shuruucaha ku qeexan cutubkaan

Haddii aysan suurtagal ahayn ama aysan macquul ahayn in aad la xiriirto adeeg-bixiye ku jira shabakad, waxaanu dabooli doonnaa daryeelka degdega ah ee aad ka hesho adeeg-bixiye shabakad ka baxsan.

Waxaad liiska bixiyeyaasha daryeelka degdega ah ee *Provider and Pharmacy Directory*, ka heli kartaa khadka **ucare.org/searchnetwork**, ama adoo wacaya Adeegga Macaamiisha lambarka ku yaal boggan dhanka hoose.

Si aad u ogaato sida aad u heli karto daryeelka xaalada degdega ah ee aad u baahan tahay, waxa aad kala hadli kartaa PCP-kaaga, ama la hadal kh UCare 24/7 Nurse Line, kaas oo shaqeeya 24 saacadood, 7 maalmood todobaadkii. (Lambarka taleefanka waxa uu ku yaalaa dhabarka kaadhka xubinta caymiskaaga.) UCare 24/7 Nurse Line waxa uu ku siin karaa macluumaadka ku saabsan sida aad u heli karto daryeelka kadib saacadaha shaqada caadiga ah.

### **Daryeelka degdega ah ee loo baahan yahay marka ka baxsan aagga adeegga ee qorshahayaga**

Marka aad ka baxsan tahay goobta adeegga ee qorshahayaga, waxaa laga yaabaa inaad daryeel ka heli karin adeeg-bixiye ku jira shabakadda. Xaaladdaas, qorshahayagu wuxuu daboolayaa daryeelka degdega ah ee aad ka hesho adeeg-bixiye kasta.

Qorshahayagu ma daboolayo daryeelka degdega ah ee loo baahan yahay ama daryeel kasta oo kale oo aad ka hesho meel ka baxsan Maraykanka iyo dhulalkiisa.

### **H3. Daryeelka inta lagu jiro musiibo**

Haddii guddoomiyaha gobolkaaga, Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, ama Madaxweynaha Maraykanku uu ku dhawaaqo xaalad musiibo ama xaalad degdeg ah ee aaggaaga juqraafiga, waxaad weli xaq u leedahay inaad daryeel ka hesho qorshahayaga.

Booqo websaydkeena si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sidaad u heli lahayd daryeelka aad u baahan tahay inta lagu jiro musiibo la sheegay: **ucare.org/important-coverage-information**.

Inta lagu jiro musiibo la sheegay, haddii aadan isticmaali karin adeeg-bixiye ku jira shabakadda,



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://ucare.org).**

waxaad daryeel ka heli kartaa adeeg-bixiyayaasha shabakadaha ka baxsan weliba si lacag la'aan ah. Haddii aadan isticmaali karin farmashiyaha shabakadda inta lagu jiro musiibo la sheegay, waxaad ka buuxsan kartaa daawooyinkaaga farmashiyaha ka baxsan shabakada. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah, tixraac ku sameey **Cutub 5** ee *Member Handbook*.

---

## I. Waxa la sameeyo haddii si toos ah laguugu soo dallaco adeegyada qorshahayagu daboolayo

Ma ogolaanayno bixiyayaasha UCare Connect + Medicare inay kugu soo dallacaan adeegyadan. Waxa aanu u siinaa lacagta si toos ah bixiyayaasha, oo waxa aanu kaa ilaalin doonaa wixii kharash ah. Haddii adeeg-bixiye kuu soo diro biil bedelkii uu u diri lahaa qorshahayaga, waa inaad na weydiisataa inaan bixino biilka.

**Waa inaad adigu iska bixin biilka. Haddii aad adigab bixiso, waxaa laga yaabaa inaan dib kuugu soo celin karin lacagtaass.**

Haddii aad bixisay kharashka adeegyadaada caymiska ama haddii aad heshay biil adeegyada caafimaadka la daboolay, tixraac **Cutubka 7** ee *Member Handbook* si aad u ogaato waxa la sameeyo.

### I1. Maxaa la sameeyaa haddii qorshahayagu aanu daboolin adeegyada

Qorshahayagu wuxuu daboolayaa dhammaan adeegyada:

- kuwaas oo la go'aamiyey caafimaad ahaan inay lagama maarmaanka u yihiin, **iy**
- kuwaas oo ku taxan Jaantuska Gunnooyinka qorshahayaga (tixraac **Cutubka 4** ee *Qaybta D* ee *Member Handbook*), **iy**
- aad heleyso marka aad raacdo shuruucda caymiska.

Haddii aad hesho adeeyo aanu qorshahayagu daboolin, **adiga ayaa bixinaya kharashka oo dhan.**

Haddii aad rabto inaad ogaato haddii aan bixinno adeeg caafimaad ama daryeel, waxaad xaq u leedahay inaad na weydiiso. Waxa aad sidoo kale xaq u leedahay inaad naga dalbato qoraalkan. Haddii aanu kuu sheegno in aanaan kharashka adeegyadaada bixinaynin, waxa aad xaq u leedahay inaad ka qaadata rafcaan go'aankeena.

**Cutubka 9** ee *Member Handbook* wuxuu sharxayaa waxa la sameeyo haddii aad rabto in aanu daboolno adeeg ama shay. Wuxuu kaloo kuu sheegayaa sida aad uga dacwoon karto go'aanka caymiska. Wac Adeegga Macmiilka si aad wax badan uga ogaato xuquuqahaaga racfaanka.

Waxaan bixinaa adeegyada qaar ilaa xad. Haddii aad ka gudubto xadka, waxaad bixinaysaa



---

**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

kharashka oo dhan si aad u hesho adeeg intaas ka badan. Tixraac **Cutubka 4aad** Qaybta D ee xadka gunnooyinka gaarka ah. Wac Adeegga Macmiilka si aad u ogaato waxa ay yihiin xadka gunnooyinka iyo inta gunnooyinka aad isticmaashay.

---

## J. Daboolista adeegyada daryeelka caafimaadka ee daraasad cilmi-baaris caafimaad

### J1. Qeexida daraasad cilmi-baaris caafimaad

Daraasada cilmi baarista caafimaadka (sidoo kale loo yaqaan tijaabada caafimaadka) waxaa weeye qaabka dhakhtaradu u tijaabiyaan noocyada cusub ee daryeelka caafimaadka ama dawooyinka. Daraasad cilmi-baaris caafimaad oo ay ansixisay Medicare waxay caadi ahaan weydiisataa tabaruceyaal inay ku jiraan daraasadda.

Marka Medicare ay ogolaato daraasad aad rabto inaad ka qaybqaadato, oo aad muujiso xiisaha, qof ka shaqeeya daraasadda ayaa kula soo xiriiraya. Qofkaas ayaa kuu sheegaya daraasadda oo ogaanaya haddii aad u qalanto inaad ka mid noqoto. Waxaad ka mid ahaankartaa daraasadda ilaa inta aad ka soo baxaysoshuruudda loo baahan yahay. Waa in aad fahanto oo aqbashaa waxa ay tahay in aad daraasadda ku samayso.

Inta aad ku jirto daraasadda, waxaa laga yaabaa inaad ku sii jirto qorshahayaga. Habkaas, qorshahayagu wuxuu ku sii wadaa inuu kugu daboolo adeegyada iyo daryeelka aan khusayn daraasadda.

Haddii aad rabto in aad ka qayb qaadato mid kasta oo ka mid ah daraasadaha cilmi-baarista ee ay Medicare ogolaatay, **uma** baahnid inaad noo sheegto ama aad ogolaansho naga hesho anaga ama daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga. Adeeg-bixiyeyaasha ku siinaya daryeelka **uma** baahna inay qayb ka ahaadaan adeeg-bixiyeyaasha ku jira shabakadda. Fadlan ogow in tani aysan ku jirin gunnooyinka uu qorshaheennu mas'uul ka yahay oo ay ku jiraan, qayb ahaan, tijaabo caafimaad ama diiwaan si loo qiimeeyo gunnooyinkaaga. Kuwaas waxaa ka mid ah gunnooyinka qaarkood ee lagu qeexay go'aaminta caymiska qaranka u baahan caymis leh hormar caddeyn (NCDs-CED) iyo daraasaddaha ka-dhaaftaanka qalabyada baaritaanka (IDE) waxaana laga yaabaa inay hoos yimaadaan helitaanka oggolaansho hore iyo sharciyada kale ee qorshaha.

### **Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad noo sheegto ka hor intaadan ka qayb qaadan daraasad cilmi-baaris caafimaad.**

Haddii aad qorsheyneyso inaad ka qaybqaadato daraasad cilmi-baaris caafimaad, oo ay daboolayso dadka is-diiwaangeliyay ee Original Medicare, waxaan kugu dhiirigelinaynaa adiga ama isku-duwaha daryeelkaaga inaad la xiriirtaan Adeegga Macmiilka si aad noogu sheegtaan inaad ka qaybqaadan doonto tijaabada caafimaad.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## J2. Lacag bixinta adeegyada marka aad ku jirto daraasad cilmi-baaris caafimaad

Haddii aad si mutadawacnimo ah ugu biirto cilmi-baaris caafimaad oo Medicare ogolaato, waxba kama bixinaysid adeegyada lagu bixiyo daraasadda. Medicare waxay bixisaa adeegyada lagu daboolay daraasadda iyo sidoo kale kharashyada joogtada ah ee la xiriira daryeelkaaga. Markaad ku biirto daraasadda cilmi-baarista bukaan-socodka ee Medicare ay oggolaatay, waxaa lagugu daboolay inta badan adeegyada iyo alaabta aad ka hesho daraasadda. Tani waxaa ka mid ah:

- qolka iyo caymiska joogitaanka cisbitaalka Medicare bixin doonto xitaa haddii aadan daraasad ku jirin
- qalliin ama hab kale oo caafimaad oo qayb ka ah daraasad cilmi baaris.
- daaweynta waxyeellooyin kasta iyo dhibaatooyinka daryeelka cusub.

Haddii aad qayb ka tahay daraasad **aanu** Medicare oggolaan, waxaad bixinaysaa kharash kasta oo ku saabsan ka qaybgalka daraasadda.

## J3. Wax badan oo ku saabsan daraasadaha cilmi-baarista caafimaadka

Waxaad wax badan ka baran kartaa ku biirista daraasadda cilmi-baadhistada caafimaadka adiga oo akhriya “Medicare & Daraasadda Cilmi-baarista Caafimaadka” ee websaydka Medicare (<https://www.medicare.gov/sites/default/files/2019-09/02226-medicare-and-clinical-research-studies.pdf>). Waxaad sidoo kale wici kartaa 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227), 24 saac maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 1-877-486-2048.

---

## K. Sida adeegyadaada daryeelka caafimaadka loogu daboolo machad diineed oo aan caafimaad ahayn

### K1. Qeexida machad daryeel diineed oo aan caafimaad ahayn

Machad diini ah oo aan caafimaad ahayn waa xarun daryeel caafimaad oo aad caadi ahaan ka heli karto cisbitaal ama xarun kalkaalinnada caafimaad oo xirfad leh. Haddii daryeelka isbitaal ama xarun kalkaalinnada caafimaad oo xirfad leh ay ka soo horjeedo caqiidadaada diinta, waxaan dabooli doonaa daryeelka machad aan caafimaad ahayn oo diineed.

Dheeftan waxa kaliya oo loogu talagalay adeegyada bukaan-jiifka ee Qaybta A (adeegyada daryeelka caafimaadka ee aan caafimaadka ahayn).

### K2. Daryeelka laga helo machad daryeel caafimaad oo diineed oo aan caafimaad ahayn

Si aad daryeel uga hesho machad diineed oo aan caafimaad ahayn, waa in aad saxiixdo



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://www.ucare.org).**

dukumeenti sharci ah oo sheegaya in aad ka soo horjeedo in aad hesho daawayn aan “aan laga reebin”

- “Aan ka reebnayn” daawaynta caafimaad waa daryeel kasta oo **iskaa wax u qabso ah oo aan u baahnayn** mid kasta oo federaal ah, gobolka, ama sharciga maxalliga ah.
- “Ka reeban” daawaynta caafimaadku waa daryeel kasta oo aan ahayn **aan ahayn ikhtiyaari oo looga baahan yahay** ee hoos yimaada federaalka, gobolka, ama sharciga deegaanka.

Si loo daboolo qorshahayaga, daryeelka aad ka hesho machad aan caafimaad ahayn oo diined waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

- Xarunta bixisa daryeelka waa in ay shahaado ka hesho Medicare.
- Daboolista qorshaheenna adeegyada waxay ku kooban tahay dhinacyada aan diinta ahayn ee daryeelka.
- Haddii aad adeegyo ka hesho machadkan kuwaas oo lagugu siiyo xarun:
  - Waa inaad leedahay xaalad caafimaad oo kuu ogolaanaysa inaad hesho adeegyada daryeelka bukaan-jiifka ee isbitaalka ama daryeelka xarunta kalkaalinta xirfad leh.
  - Waa in aad anaga naga hesho ogolaansho ka hor inta aan lagu gelinin xarunta, haddii kale joogitaankaaga laguma **dabooli** doono caymiska.

Daboolistani ma xaddidna ilaa inta ay caafimaad ahaan lagama maarmaan tahay.

---

## L. Qalab caafimaad oo waara (DME)

### L1. DME xubin ahaan qorshaheena

DME waxaa ku jira waxyaabo caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah oo uu dalbado adeeg-bixiyaha, sida kuraasta curyaamiinta, biraha, nidaamyada joodariga korontada ku shaqeeya, sahayda xanuunka sonkorowga, sariiraha isbitaalka ee uu dalbado adeeg-bixiyaha si loogu isticmaalo guriga, faleebada xididada (IV) bambooyinka, qalabka hadalka, qalabka ogsijiinta iyo sahayda, qalabka neefta, iyo qalabka lagu socdo.

Had iyo jeer waxaad leedahay shay gaar ah, sida qalabka wax-soo-saarka.

Qaybtan, waxaanu kaga hadlaynaa DME aad kiraysanayso. Maadaama aad tahay xubin ka tirsan qorshahayaga, badanaa ma **lahaan** doontid DME, iyada oo aan loo eegin muddada aad kiraysanayso.

Xaalado xaddidan oo gaar ah, waxaanu kugu wareejinaynaa lahaanshaha shayga DME. Wac



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegga Macmiilka si aad u ogaato shuruudaha ay tahay inaad buuxiso iyo waraaqaha aad u baahan tahay inaad bixiso.

Xitaa haddii aad lahayd DME ilaa 12 bilood oo isku xigta oo hoos imaanaya Medicare ka hor **intaadan** ku biirin qorshahayaga, ma lahaan doontid qalabkaas.

## L2. Lahaanshaha DME haddii aad u beddesho Medicare Original

Barnaamijka Medicare Asalka ah, dadka kiraystay noocyada DME qaarkood ayaa iska leh 13 bilood kadib. Qorshaha Medicare Advantage, qorshuhu wuxuu dejin karaa tirada bilaha ay tahay inay dadku kiraystaan noocyada DME ka hor intaysan yeelan.

**Fiiro gaar ah:** Waxaad qeexitaannada Original Medicare iyo Qorshaha MA ka heli kartaa **cutubka 12**. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo iyaga ku saabsan buug-gacmeedka *Medicare & You 2025* Haddii aadan haysan koobiga buug-yarahaan, waxaad ka heli kartaa websaydka Medicare-ka ([www.medicare.gov/medicare-and-you](http://www.medicare.gov/medicare-and-you)) ama adigoo wacaya 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227), 24 saac maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 1-877-486-2048.

Waa inaad bixisaa 13 lacag bixin oo isku xigta sida hoos timaada Original Medicare, ama waa inaad bixisaa tirada lacag bixinta ee isku xigta ee uu dejiyo qorshaha MA, si aad u yeelato qalabka DME haddii:

- ma aadan noqon mulkiilaha shayga DME intaad ku jirtay qorshahayaga, **iy**
- aad ka tagto qorshahayaga oo aad gunnooyinka Medicare ka hesho meel ka baxsan qorshe kasta oo caafimaad oo ku jira barnaamijka Medicare Original ama qorshaha MA.

Haddii aad lacag ku bixisay qalabka DME ee hoos yimaada Original Medicare ama qorshaha MA ka hor intaad ku biirin qorshahayaga, lacagahaas **Original Medicare ama MA laguma xisaabinayo lacagaha aad u baahan tahay inaad bixiso ka dib markaad ka baxdo qorshahayaga.**

- Waa inaad bixisaa 13 lacag-bixinno cusub oo isku xigta oo hoos yimaada Original Medicare ama tiro lacag-bixinno cusub ah oo isku xigta oo uu dejiyo MA qorshaha lahaanshaha qalabka DME.
- Ma jiraan wax ka reeban arrintan marka aad ku laabato Original Medicare ama qorshaha MA.

## L3. Qalabka ogsijiinta ayaa faa'iido u leh xubin kamid ahaanshaha qorshahayaga

Haddii aad u qalanto qalabka ogsijiinta ee uu daboolo Medicare oo aad xubin ka tahay



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



qorshahayaga, waxaanu daboolaynaa:

- kirada qalabka ogsijiinta
- bixinta ogsijiinta iyo waxa ku jira ogsijiinta.
- tuubo galinta iyo qalabyada la xidhiidha bixinta ogsijiinta iyo waxa ku jira ogsijiinta
- dayactirka qalabka ogsijiinta

Qalabka ogsijiinta waa in la soo celiyaa marka aysan caafimaad ahaan daruuri kuugu ahayn ama haddii aad ka tagto qorshahayaga.

#### **L4. Qalabka ogsijiinta marka aad u beddesho Original Medicare, ama qorshe kale oo Medicare Advantage (MA).**

Marka qalabka ogsijiinta caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay **aad ka tagto qorshahayaga oo aad u beddesho qorshe kale oo Medicare Advantage**, qorshuhu wuxuu dabooli doonaa ugu yaraan waxa Medicare-ka asalka ahi daboolo. Lacag bixinta kirada bishiiba waxay dabooshaa qalabka ogsijiinta iyo saadka iyo adeegyada kor ku xusan.

Haddii qalabka ogsijiinta uu caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay ka **dib markaad kireysato 36 bilood** alaab-qeybiyahaagu waa inuu bixiyaa:

- qalabka ogsijiinta, sahayda, iyo adeegyada 24 bilood oo kale
- qalabka ogsijiinta iyo sahayda ilaa 5 sano haddii caafimaad ahaan loo baahdo

Haddii qalabka ogsijiinta uu weli caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay **dhammaadka muddada 5-sano**:

- Alaab-qeybiyahaagu mar dambe uma baahna inuu bixiyo, waxaadna dooran kartaa inaad ka hesho qalab beddela alaab-qeybiye kasta.
- 5-sano oo cusub ayaa bilaabmaya.
- Waxaad ka kiraysanaysaa alaab-qeybiye muddo 36 bilood ah.
- Alaab-qeybiyahaagu wuxuu markaa ku siinayaa qalabka ogsijiinta, sahayda, iyo adeegyada 24 bilood oo kale.
- Wareeg cusub ayaa bilaabma 5 sanaba mar ilaa inta qalabka ogsijiinta uu caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay.

Marka qalabka ogsijiinta uu caafimaad ahaan lagama maarmaan u yahay oo aad **ka tagto qorshahayaga oo aad u beddesho qorshe kale oo MA**, qorshuhu wuxuu dabooli doonaa ugu yaraan waxa Original Medicare uu daboolo. Waxaad waydiin kartaa qorshahaaga cusub ee MA waxa uu yahay qalabka ogsijiinta iyo sahayda uu daboolayo iyo waxa uu noqon doono



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://www.ucare.org).**

kharashyadaada.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii.  
**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://www.ucare.org).**

## **Cutubka 4: Jaantuska gunnooyinka**

---

### **Hordhaca**

Cutubkani waxa uu kaaga warramayaa adeegyada qorshaheenu daboolo iyo wixii xaddidaad ah ama xaddidaad ah ee adeegyadaas ah. Waxay kaloo kuu sheegaysaa dheefaha aan lagu daboolin qorshahayaga. Erayada muhiimka ah iyo qeexitaankoodu waxay u soo baxayaan siday u kala horreeyaan alifbeetada cutubka ugu dambeeya ee *Member Handbook*.

### **Jadwalka Tasmada**

<b>A. Adeegyadaada la daboolay .....</b>	<b>68</b>
<b>B. Xeerar ka soo horjeeda daryeel bixiyeyaasha kugu soo dalacaya adeegyada .....</b>	<b>68</b>
<b>C. Ku saabsan Shaxda Gunnooyinka qorshahayaga .....</b>	<b>68</b>
<b>D. Shaxda Faa'iidooyinka Qorshahayaga .....</b>	<b>73</b>
<b>E. Gunnooyinka lagu daboolay meel ka baxsan qorshahayaga.....</b>	<b>149</b>
E1. Daryeelka Hospice-ka .....	149
E2. Adeegyada Kale.....	150
<b>F. Gunnooyinka aan lagu daboolin qorshahayaga, Medicare, ama Caawinta Caafimaadka .....</b>	<b>151</b>



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

---

## A. Adeegyadaada la daboolay

Cutubkani waxa uu kaaga warramayaa adeegyada uu qorshahayagu daboolayo. Waxa kale oo aad baran kartaa shaqada aan lahayn. Macluumaadka ku saabsan gunnooyinka daroogada ayaa ku jira **Cutubka 5 ee Member Handbook**. Cutubkani waxa kale oo uu sharaxayaa xadka adeegyada qaarkood.

Maadaama aad caawimaad ka hesho Medical Assistance, waxba kama bixinaysid adeegyadaada caymiska waase haddii aad raacayso xeerarka qorshahayaga. Ka eeg **Cutubka 3 ee Member Handbook** wixii tafaasiil ah ee ku saabsan xeerarka qorshaha.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fahmida adeegyada caymiska uu daboolay, care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga) iyo/ama Adeegga Macaamiisha ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaankan waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash) 8 am – 8 pm, toddobo maalmood usbuucii.

---

## B. Xeerar ka soo horjeeda daryeel bixiyayaasha kugu soo dalacaya adeegyada

Ma ogolin adeeg-bixiyayaashayadu inay kugu soo dallacaan kharashaadka adeegyada daboolay shabakada. Waxa aanu u siinaa lacagta si toos ah bixiyayaasha, oo waxa aanu kaa ilaalin doonaa wixii kharash ah. Tani waa run xitaa haddii aan siinno daryeel bixiyaha wax ka yar kharashka bixiyaha adeegga.

**Waa inaadan waligaa ka helin biil bixiyaha adeegyada la daboolay.** Haddii aad sameyso, tixraac **Cutubka 7 ee Member Handbook** ama wac Adeegga Macaamiisha.

---

## C. Ku saabsan Shaxda Gunnooyinka qorshahayaga

Jaantuska Gunnooyinka ayaa kuu sheegaya adeegyada uu qorshahayagu bixiyo. Waxay taxdaa adeegyada la daboolay siday u kala horreeyaan oo ay u sharraxdaa.

**Waxaan bixinaa adeegyada ku qoran Jaantuska Gunnooyinka marka sharciyada soo socda la buuxiyo.** Wax kharash ah kama bixinaysid adeegyada ku qoran Jaantuska Gunnooyinka, waase inta aad buuxinayso shuruudaha hoos lagu sharraxay.

- Waxaan bixinaa adeegyada ceymiska ee Medicare iyo Medical Assistance sida waafaqsan qawaaniinta ay dajiyeen Medicare iyo Medical Assistance.
- Adeegyada (ay ku jiraan daryeelka caafimaadka, caafimaadka habdhaqanka iyo adeegyada isticmaalka muqaadaraadka, adeegyada iyo taageerada muddada-dheer, saadka, qalabka, iyo daawooyinka) waa inay ahaadaan kuwo “caafimaad ahaan lagama maarmaan ah.” Caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah ayaa qeexaya adeegyada,



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

saadka, ama daawooyinka aad u baahan tahay ka hortagto, baarto, ama ku daawayso xaalad caafimaad ama si aad u ilaaliso xaaladaada caafimaad ee hadda. Tan waxa ku jira daryeelka kaa ilaalinaya inaad cosbitaalka ama xarunta kalkaalinta aado. Waxa uu sidoo kale ka dhigan yahay adeegyada, agabyada, ama dawooyinka buuxiya heerarka caadiga ah ee nidaamka caafimaad.

- Daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah waxaa uu ku haboon yahay xaaladaada. Tan waxa ku jira daryeelka la xidhiidha xaaladaha jidhka iyo caafimaadka hab-dhaqank(oo ay ku jirto caafimaadka dhimirka iyo Ciladaha isticmaalka mukhaadaraadka). Waxa sidoo kale kamid ah nooca iyo heerka adeegyada. Waxa sidoo kale kamid ah tirada daawaynta. Waxaa sidoo kale kamid ah halka aad ka heleyso adeegyada iyo mudada ay soconayaan. Adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waa inay:
  - noqdaan adeegyada, agabka iyo dawooyinka dhakhtarku qamao ee bixiyeyaasha kale ay badanaa dalbadaan.
  - kaa caawin inaad si fiican u fiicnaato ama aad u joogtid sida aad tahay.
  - Caawinta joojinta xaaladaada inay ka sii darto.
  - caawin ka hortagga iyo helida dhibaatooyin caafimaad.
- Xubnaha cusub qorshuhu waa in uu bixiyaa ugu yaraan 90-maalmood oo kala-guur ah, wakhtigaas oo laga yaabo in qorshaha cusub ee Medicare Advantage aanu u baahnayn ogolaansho hore ee koorsada daawaynta ee socota, xitaa haddii koorsada daaweyntu ay ahayd mid loogu talagalay adeeg uu bilaaway adeeg-bixiye ka baxsan shabakada.
- Waxaad daryeelkaaga ka heleysaa adeeg-bixiye ku jira shabakadda. Adeeg-bixiye ku jira shabakadu waa adeeg-bixiye nala shaqeeya. Inta badan, daryeelka aad ka hesho adeeg-bixiye ka baxsan shabakada ma dabooli doono marka laga reebo haddii ay tahay xaalad degdeg ah ama daryeelka degdega ah ama marka laga reebo haddii qorshahaaga ama adeeg-bixiyaha ku jira shabakadu ay ku siiyaan gudbin. **Cutubka 3** ee *Member Handbook* waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalka shabakadaha iyo adeeg-bixiyeyaasha shabakadaha ka baxsan.
- UCare ama hay'adda ansixinta ee la magacaabay waxay sii wadi kartaa oggolaanshaha hore loogu ansixiyay adeeg-bixiye ka baxsan shabakadda 120 ka maalmood ee ugu horreeya.
- Haddii bixiyaha aad doomaatay aanu ku jirin shabakadayada Qorshaha, waa inaad doorataa adeeg-bixiye kale oo shabakada ku jira oo bixiya qorshaha. Waxaa laga yaabaa inaad sii wadato isticmaalka adeegyada bixiyaha aan hadda ka tirsanayn shabakadayada Qorshaha ilaa 120 maalmood sababaha soo socda awgood:
  - Xaalad halis ah
  - Xanuun maskaxeed ama jidheed oo aad u daran.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Laxaad la'aan jidh ama maskaxeed taas oo lagu sheegey awood la'aan la shaqayn mid ama wax ka badan hawlaha nolosha ee waayn. Tani waxay khusaysaa laxaad la'aanta jirta muddo ka badan ama la filanayo inay jirto ugu yaraan hal sano, ama ay u badan tahay inay keento dhimasho.
- Laxaad la'aanta ama xanuunada mudada dheer oo ku jira wakhtiga xaalada adag.
- Haddii adeeg-bixiyahaaga caafimaadka u qalma uu caddeeyo inaad haysato cimri la filayo oo ah 180 maalmood ama ka yar, waxa laga yaabaa inaad sii wadato isticmaalka adeegyada noloshaada inta ka hartay adeeg bixiyaha aan ka mid ahayn shabakadayada.
- Waxaanu daboolnaa adeegyada qaarkood ee ku qoran Jaantuska Gunnooyinka oo keliya haddii dhakhtarkaaga ama adeeg-bixiyayaasha shabakad kale ay helaan oggolaansho marka hore. Tan waxa loo yaqaan oggolaanshaha hore (PA). Waxaan adeegyada caymiska ku calaamadeyneynaa jaantuska gunnooyinka ee u baahan PA calaamad (\*). Intaa waxaa dheer, waa inaad PA u heshaa adeegyadan soo socda ee aan ku qornayn Jaantuska Gunnooyinka: adeegyada baxnaaninta bukaan-jiifka, qalliinka laf-dhabarta, kicinta korriinka lafaha, kiciya xudunta laf-dhabarta, iyo baaritaanka hidda-sidaha (tusaale ahaan, baadhista kansarka ama baadhitaanka lagu saadaalinayo cudur wadnaha ah). Haddii aan bixino oggolaanshaha codsiga PA ee koorsada daaweynta, oggolaanshaha waa inuu ahaadaa mid ansax ah ilaa iyo inta ay macquul tahay caafimaad ahaan ahna mid lagama maarmaanka u ah si looga fogaado carqaladeynta daryeelka ku saleysan shuruudaha caymiska, taariikhdaada caafimaad, iyo talooyinka bixiyaha daawaynta.

### **Macluumaadka Dheefaha Muhiimka ah ee Xubnaha Xaalado Joogto ah qaarkood.**

- Haddii aad leedahay xaaladaha soo socda ee dabadheeraada oo aad ka soo baxdo shuruudaha caafimaadka qaarkood, waxa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha dheeraadka ah:
  - Dhiig kar
  - Cudurka dufanka daba dheeraatay
  - Xanuun joogto ah
  - Cudurka Sonkorowga
  - Cudurka wadnaha iyo xididdada dhiigga
  - Dhibaataada Istimalka Maandooriyaha
  - Daciifnimada wadnaha
- Tixraac Caawinta Xaaladaha Joogtada ah qaarkood ee Jaantuska Gunnooyinka si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.
- Fadlan nagala soo xiriir wixii macluumaad dheeraad ah



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Dhammaan adeegyada ka hortagga waa bilaash. Waxaad ka heli doontaa tufaaxan 🍏 ee ku xiga adeegyada ka hortagga ee Jaantuska Dheefaha. Waxaad ka heli doontaa calaamad (\*) ku xigta adeegyada u baahan oggolaansho hore.

### Barnaamijka Ka Faa'iidaystaha Xaddidan

- Barnaamijka Qaataha Xaddidan waxaa loogu talagalay xubnaha si xun u isticmaalay adeegyada caafimaadka. Tan waxa ku jira helida adeegyada caafimaad ee aanay xubnuhu u baahnayn, u isticmaalida qaab kharash ka badan sidii ay ahayd, ama u isticmaali kara hab khatar ku ah caafimaadka xubinta. UCare waxay ogeysiin doontaa xubnaha haddii lagu meeleyo barnaamijka qaataha xaddidan.
- Haddii aad ku jirto Barnaamijka Qaataha Xaddidan, waa inaad ka heshaa adeeg caafimaad hal bixiye daryeel aasaasiga ah ee loo qoondeeyay, hal rug caafimaad, hal isbitaal oo uu isticmaalo bixiyaha daryeelka aasaasiga ah, iyo hal farmashi. UCare waxaa laga yaabaa inaad magacowdo daryeel bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka. Waxa kale oo laga yaabaa in lagugu meeleyo wakaalada caafimaadka guriga. Laguuma oggolaan doono inaad isticmaasho doomaashada kaalmada daryeelka shakhsi ahaaneed ama ikhtiyaarka isticmaalka dabacsan, ama adeegyada macaamiisha haga. Ma awoodi doontid in aad isticmaasho moodhelka miisaaniyadda Adeegyada iyo Taageerooyinka Koowaad ee Bulshada (Community First Services and Supports, CFSS).
- Waxa lagugu xaddidi doonaa daryeel bixiyeyaashan loo qoondeeyay daryeelka caafimaadka ugu yaraan 24 bilood ee u qalmida Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka Minnesota (MHCP). Dhammaan u fudbitaanada khabiiradawaa inay ka yimaadaan daryeel bixiyaha caafimaadkaaga, oo ay helaan Barnaamijka Ka Faa'iidaystaha Xaddidan ee UCare Ka faa'iidaystayaasha xaddidan waxaa laga yaabaa in aysan jeebkooda ka bixin si ay u isticmaalaan daryeel bixiye aan la magacaabin kaas oo la mid ah bixiyaha mid ka mid ah bixiyayaasha loo qoondeeyay.
- Meelaynta barnaamijka way kula jiri doontaa haddii aad beddesho qorshayaasha caafimaadka. Ku meelaynta barnaamijka sidoo kale way kula jiri doontaa haddii aad u beddesho adeegga ujrada-bixinta ee MHCP. Ma lumin doontid u-qalmitaanka MHCP sababtoo ah meelaynta barnaamijka.
- Dhamaadka 24 bilood, isticmaalkaaga adeegyada daryeelka caafimaadka dib ayaa loo eegi doonaa. Haddii aad weli si xun u isticmaashay adeegyada caafimaadka, waxaa lagu meelayn doonaa barnaamijka 36 bilood oo dheeraad ah oo aad xaq u leedahay.
- Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato meelaynta Barnaamijka Qaataha Xaddidan. Waa inaad ku xeraysataa racfaan 60 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ogeysiiska nagaga timid. Waa inaad rafcaan ku qaadato 30 maalmood gudahood si aad uga hortagto xaddidaadda in la fuliyo inta lagu jiro racfaankaaga. Waxaad codsan kartaa Racfaan Goboleed (Dhagaysi Cadaalad ah oo lala yeesho Gobolka) ka dib markii uu helo go'aankayaga ah in aanu go'aansanay in aanu dhaqan galino xaddidaadda. Tixraac **Cutubka 9**, Qaybta F3 ee *Member Handbook*, si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaq aad u leedahay inaad racfaan



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

qaadato.


- Barnaamijka Qaataha Xaddidan ma khuseeyo adeegyada uu daboolo Medicare. Haddii aad isticmaasho dawooyinka opioid-ka ee aad ka hesho dhakhaatiir ama farmasiyo dhowr ah, waxa laga yaabaa inaan la hadalno dhakhaatiirtaada si aan u hubinno isticmaalkaaga inuu yahay mid haboon oo caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah. La shaqeynta dhakhaatiirtaada, haddii aan go'aansanno isticmaalkaaga daawada xashiishka ama daawooyinka dhimirka aysan badqabka lahayn, waxaa laga yaabaa inaan xaddidno sida aad u heli karto daawooyinkaas. Tixraac **Cutubka 5**, Qaybta G3 ee *Member Handbook* wixii macluumaad dheeraad ah.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



## D. Shaxda Faa'iidooyinka Qorshahayaga

Adegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Baaritaanka bararka halbawlaha qaar dambaha</b></p> <p>Waxaanu baadhista ultrasound-ka ee hal mar ah siin doonaa dadka khatarta ugu jira. Qorshuhu waxa uu daboolayaa kaliya baadhista haddii aad leedahay arrimo halis ah iyo haddii aad tixraac ka hesho dhakhtarkaaga, kaaliyaha dhakhtarkaaga, dhakhtarka kalkaalisada, ama kalkaalisada takhasuska leh.</p> <p>Waxaa laga yaabaa inaan daboolno baaritaanno dheeri ah haddii caafimaad ahaan loo baahdo.</p>	\$0
<p><b>Irbad ku mudista</b></p> <p>Adegyada ku daaweynta cirbadaha waxa la daboolaa marka uu bixiyo irbad yaqaan rukhsad haysta ama dhakhtar kale oo Minnesota oo rukhsad haysta oo leh tababbarka irbad ku mudista iyo aqoonsiga.</p> <p>Waxaan bixin doonaa ilaa 12 booqashooyinka toobinta maqaarka ah 90 maalmood gudahooda haddii aad qabto xanuunka dhabarka hoose ee joogtada ah, oo lagu qeexay sida:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• soconaysa 12 toddobaad ama ka badan;</li> <li>• aan gaar ahayn (aan lahayn sabab nidaamsan oo la aqoonsan karo, sida aan lala xiriirin cudurka dheef-shiid kiimikaadka, bararka, ama caabuqa);</li> <li>• aan la xiriirin qalliin; <b>and</b></li> <li>• aan la xiriirin uurka.</li> </ul> <p>Intaa waxaa dheer, waxaan bixinaa siddeed kalfadhi oo dheeraad ah oo toobinta maqaarka ah oo loogu talagalay xanuunka dhabarka hooseeya ee daba-dheeraada haddii aad muujiso horumar. Waxaa laga yaabaa inaad helin wax ka badan 20 daawaynta duritaanka maqaarka ee xanuunka dhabarka hooseeya ee daba-dheeraada sannad kasta.</p> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	\$0




**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Daaweynta duritaanka maqaarka (sii socda)</b></p> <p>Daaweynta cirbadaha waa in la joojiyaa haddii aadan raysan ama haddii aad ka sii dari weydo.</p> <p>Intaa waxaa dheer, qorshuhu wuxuu bixin doonaa ilaa 20 unug oo adeegyada acupuncture sanadkiiba iyada oo aan oggolaansho laga helin kuwa soo socda. Weydiiso oggolaansho hamae haddii qeybo dheeraad ah loo baahan yahay.</p> <p>Adeegyada duritaanka maqaarka waxaa lagu daboolaa kuwa soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• xanuun ba'an iyo mid joogto ah</li> <li>• niyad jab</li> <li>• walaac</li> <li>• xaruunka 'schizophrenia'</li> <li>• calaamada walbahaarka ka dambeeya waxyeelada</li> <li>• hurdo la'aan</li> <li>• joojinta sigaarka</li> <li>• lugaha aan nasan karin</li> <li>• xanuunka caadada</li> <li>• afka oo qalala (afka qalalan) ee la xidhiidha kuwan soo socda:       <ul style="list-style-type: none"> <li>– Cudurka idhaha iyo afka oo qala</li> <li>– ku daawaynta shucaaca</li> </ul> </li> <li>• lalabbo iyo matag la xiriira waxyaabaha soo socda:       <ul style="list-style-type: none"> <li>– nidaamyada qaliinka ka dib</li> <li>– uurka</li> <li>– daryeelka kansarka</li> </ul> </li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<b>Daaweynta duritaanka maqaarka (sii socda)</b>	
<ul style="list-style-type: none"> <li>• Waxaan sidoo kale bixinaa gunnooyinka toobinta maqaarka ee dheeraadka ah sanadkiiba adeegyo dheeraad ah oo ka baxsan waxa kor ku qoran ama aan daboolin Medical Assistance. Xaddidaayo caymis oo dheeraad ah ayaa laga yaabaa inay khuseeyaan. kuwan waxaa kamida: <ul style="list-style-type: none"> <li>– Illaa 12 booqashooyin dheeraad ah oo toobinta maqaarka ah sanadkiiba xanuunka dhabarka hoose ee <u>ba'an</u>. Xanuunka dhabarka hoose ee ba'an waa xanuun si lama filaan ah u yimaada, waa muddo gaaban (wuxuu socdaa dhowr maalmood ilaa dhowr toddobaad) ka dibna taga.</li> </ul> </li> </ul>	\$0
 <b>Baaritaanka iyo la-talinta si xun u isticmaalka khamriga</b>	
<p>Waxaanu bixin doonaa kharashka hal baadhis oo si xun u isticmaalka alkoholka ee dadka waaweyn ee si xun u isticmaala aalkolada balse aan khamriga ku xirnayn. Dadkaas waxaa ku jira haweenka uurka leh.</p> <p>Haddii aad si xun u isticmaasho khamriga, waxaad heli kartaa ilaa afar kulan oo kooban, fool ka fool ah oo la-talin ah sannad kasta (haddii aad awooddo oo aad ka digtoonaato inta lagu jiro la-talinta) bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee u qalma (PCP) ama xirfadle ku jira daryeelka aasaasiga ah (tixraac qaybta “Adeegyada cilladda isticmaalka maandooriyaha bukaan-socodka” ee jaantuskan si aad u hesho gunnooyinka dheeraad ah oo la daboolay).</p>	\$0
<b>Adeegyada Ambalaaska</b>	
<p>Adeegyada ambalaaska ee daboolan, hadday tahay xaalad degdeg ah ama xaalad aan degdeg ahayn waxaa ka mid ah dhulka iyo hawada (diyaarad iyo helikobtar), iyo adeegyada ambalaasta. Ambalaasta ayaa ku geyn doonta meesha kuugu dhow oo ku siin karta daryeel.</p>	\$0
<b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b>	





**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada Gaariga gurmada caafimaadka (sii socda)</b></p> <p>Xaaladdaadu waa inay noqotaa mid halis ah oo ku filan siyaabaha kale ee aad ku tagi karto meel daryeel ay khatar gelin karaan caafimaadkaaga ama noloshaada.</p> <p>Adeegyada ambalaasta ee kiisaska kale (aan degdeg ahayn) waa in aan ansixino anaga. Kiisaska aan ahayn xaalad degdeg ah, waxa laga yaabaa in aanu bixino khrashaadka ambalaasta. Xaaladaadu waa inay noqotaa mid halis ah oo hadii lagu gayn waayo meel daryeel ay khatar gelin karaan noloshaada ama caafimaadkaaga.</p>	
<p> <b>Booqashada ladnaanta sannadlaha ah</b></p> <p>Waxaad heli kartaa baaritaan sanadle ah. Tani waa in la sameeyo ama la cusboonaysiiyo qorshe ka hortag ah oo ku salaysan qodobbada khatartaada hadda ah. Waxaan bixinaa midaan hal mar 12 biloodba.</p> <p><b>Fiiro gaar ah:</b> Booqashadaada badqabka ee ugu horeysa ma dhici karto 12 bilood gudahooda ee Xilliga <b>Ku Soo Dhowaanshahaaga</b> Medicare. Si kastaba ha ahaatee, uma baahnid in lagugu <b>soo dhaweeyo booqashada Medicare</b> si aad u hesho booqashooyinka badqabka ee sanadlaha ah ka dib markaad qaadatay Part B 12 bilood.</p>	\$0
<p> <b>Cabirka culayska lafta</b></p> <p>Waxaan habraacyada qaarkood siinaa xubnaha u qalma (sida caadiga ah, qof halis ugu jira inuu lumiyo cufnaanta lafaha ama khatarta ah lafo-beelka). Nidaamyadani waxay tilmaamayaan cufnaanta lafaha, waxay ogaadaan lafo lumis, ama waxay ogaadaan tayada lafaha.</p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada hal mar 24 bilood ama in ka badan haddii caafimaad ahaan loo baahdo. Waxa kale oo aanu bixinaa dhakhtarka si uu u eego ugana faalloodo natiijada.</p>	\$0




**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Baaritaanka kansarka naasaha (mammograms)</b></p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• hal raajo/baaritaan oo aasaasiga ah inta u dhexeysa da'da 35 iyo 39</li> <li>• hal raajo/baaritaan oo naasaha ah 12-kii biloodba mar ee dumarka da'doodu tahay 40 iyo wixii ka weyn</li> <li>• baadhitaannada naaska hal mar 24 biloodba mar</li> </ul>	\$0
<p><b>Adeegyada baxnaaninta wadnaha (wadnaha).</b></p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada baxnaaninta wadnaha sida jimicsiga, waxbarashada, iyo la-talinta. Xubnuhu waa inay buuxiyaan shuruudaha qaarkood oo ay haystaan amar dhakhtar.</p> <p>Waxaan sidoo kale daboolnaa barnaamijyada baxnaaninta wadnaha ee degdega ah, kuwaas oo aad uga daran barnaamijyada baxnaaninta wadnaha.</p>	\$0
<p> <b>Booqashada khatar dhimista cudurada wadnaha iyo xididada (wadnaha) (daaweynta cudurada wadnaha)</b></p> <p>Waxaan bixinaa hal booqasho sannadkii, ama ka badan haddii caafimaad ahaan loo baahdo, oo lagu aadayo daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) si uu kaaga caawiyo hoos u dhigida khatarta cudurrada wadnaha. Inta lagu jiro booqashada ama booqashooyinka, dhakhtarkaagu waxa laga yaabaa inuu:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• kala hadal isticmaalka aspirin,</li> <li>• hubiyo cadaadiska dhiiggaaga, <b>iyoma</b></li> <li>• Ku siiyo talooyin si aad u hubiso inaad si fiican wax u cunayso.</li> </ul>	\$0



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Baaritaanka cudurada wadnaha iyo xididada (wadnaha).</b></p> <p>Waxaan bixinaa kharashka baaritaanka dhiigga si aan u eegno cudurada wadnaha hal mar shantii sano (60 bilood). Tijaabooyinkan dhiigga waxay sidoo kale eegaan cilladaha ay sabab u tahay khatarta sare ee cudurrada wadnaha.</p>	\$0
<p><b>Iskuduwidda daryeelka</b></p> <p>Waxaa lagu magacaabaa isku duwaha daryeelka oo kaa caawin kara inuu kugu xidho adeegyada iyo ilaha aad u baahan tahay si aad u heshod aryeelka ugu wanaagsan ee suuragalka ah. Isku duwayaasha daryeelku sidoo kale waxay kaa caawin karaan inaad barato wax badan oo ku saabsan caafimaadkaaga, xaalad kasta oo caafimaad oo aad qabto oo waxay kaa caawin karaan inaad raacdo qorshahaaga taageerada. Isku-duwayaasha daryeelka iyo shaqaalaha Adeegga Macmiilka ee UCare Connect + Medicare ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan UCare Connect + Medicare iyo barnaamijka SNBC.</p> <p>Kooxda isku-duwidda daryeelkaaga ayaa kula soo xiriiri doona si ay u bixiyaan qiimayn khatar caafimaad si loo go'aamiyo baahiyaha isuduwidda daryeelka.</p> <p>Isku duwida daryeelka had iyo jeer adiga waa lagu heli karaa. Waxaad joojin kartaa isticmaalka adeegan wakhti kasta adiga oo u sheegaya iskuduwaha daryeelkaaga ama la xiriir UCare Connect + Medicare. Haddii aad rabto inaad bedesho iskuduwaha daryeelkaaga, wac Adeegga Macmiilka lambarka ku yaal bogga hoose.</p> <p>Adeegyada la daboolay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qiimaynta in la aqoonsado isku duwaha daryeelku waxay kaa caawin kartaa adiga daryeelka caafimaadka, guriyaynta, amniga cuntadda iyo baahiyaha kale.</li> <li>• Caawimad ku aadan ballansashada, isku dubaridka, iyo helitaanka qiimaynta ama baaritaanada iyo adeegyada daryeelka caafimaadka sida ilkaha,</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	\$0




**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Iskuduwidda daryeelka (waa socotaa)</b></p> <p>caafimaadka habdhaqanka, baxnaaninta, iyo daryeelka aasaasiga ah</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Samaynta iyo cusboonaysiinta qorshahaaga taageerada, ku salaysan baahiyaha goonida ah iyo la shaqaynta dadka aad doorato.</li> <li>• Marka la helo ogolaanshiyahaaga, care coordinators (iskuduwayaasha daryeelka) UCare Connect + Medicare waxay la xiriiri karaan wakaaladaha iyo dadka kaa caawin kara daboolida baahiyahaaga</li> <li>• Kula shaqayn doonaa adiga iyo kuwa kale ee marka aad doorato inaad beddesho baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ama cusbitaal dhigida</li> <li>• Kaa caawin doono helida ilaha aad uga baahan tahay gudaha bulshaddaada</li> <li>• Wada jir kaala shaqayn doontaa Adeegyada Guriga iyo Bulshadda Ku salaysan ka dhaafida maareeyayasha kiiska ama maareeyayaasha kale ee kiiska</li> <li>• Ka qaybqaadashadaada, care coordinators (iskuduwayaasha daryeelka) UCare Connect + Medicare waxay sidoo kale sameeyaan kuwan soo socda: <ul style="list-style-type: none"> <li>– Waxay kaa caawiyaan dejinta hadafyada caafimaadkaaga iyo fayo qabka oo kaala shaqeeyaan adiga inaad gaadho iyaga.</li> <li>– Kuula xidhiidhaan ama si joogto ah kuula kulmaan si ay uga hadlaan caafimaadkaaga iyo fayo qabka</li> <li>– Ku xasuusiyaan marka aad u baahan tahay adeegyada ka hortagga, baadhitaanada ama ballamaha qayb ka ah qorshahaaga taageerada</li> </ul> </li> </ul>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Baaritaanka kansarka ilmo-galeenka iyo siilka</b></p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• loogu talagalay dhammaan haweenka: Baaritaannada Pap iyo miskaha hal mar 24 biloodba</li> <li>• Dumarka khatarta sare ugu jira kansarka ilmo-galeenka ama xubinta taranka haweenka: hal baaritaan oo Pap ah 12 biloodba mar</li> <li>• Haweenka marey baaritaanka Pap saddexdii sano ee la soo dhaafay oo da'da dhalmada ah: hal baaritaan oo lagu ogaado kansarka ilmo-mareenka 12 bilood kasta</li> </ul>	\$0
<p><b>Baaritaannada Caruurta iyo Dhallinta (C&amp;TC)</b></p> <p>Booqashooyinkan waxay muhiim u yihiin xaqijinta in carruurta, qaangaarka, iyo dhalinyaradu helaan adeegyada ka hortagga ah ee habboon, caafimaadka maskaxda, koboca iyo kuwa takhasuska ah.</p> <p>Iyaddoo ku xidhan da'da, booqashooyinkan waxaa ka mid ahaan kara:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• qiyaasaha korodhka</li> <li>• waxbarashada caafimaadka</li> <li>• taariikhda caafimaadka oo ay ku jirto nafaqeynta</li> <li>• baaritaanka Korriinka</li> <li>• baarista caafimaadka maskaxda ama shucuurta bulshada</li> <li>• baaritaanka jireed ee madax-ilaalugaha ah</li> <li>• tallaalo</li> <li>• baaritaannada shaybaarka</li> <li>• hubinta aragga</li> <li>• hubinta maqalka</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	\$0




**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**




Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Baarista Ilmaha iyo Dhallinta (C&amp;TC) (sii socota)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• caafimaadka hadalka, oo ay ku jiraan u marinta ‘fluumaide varnish’</li> </ul> <p>C&amp;TC waa barnaamij daryeel caafimaad oo ilmaha si wanaagsan loogu soo booqdo oo loogu talagalay xubnaha ka yar 21 sano.</p> <p>Booqasho kasta waxaa ku jiri kara wakhti qof-ka-qof ah oo lala yeesho bixiyaha daryeelka caafimaadka. Tani waxay qaangaarka iyo dhalinyerada siisaa fursad ay si gaar ah su’aalo u waydiiyaan oo ay u bartaan maaraynta caafimaadkooda.</p> <p>Xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir waa inay la xiriiraan Kilinigooda Daryeelka Aasaasiga ah si ay u ballansadaan C&amp;TC booqashooyin caafimaad oo wanaagsan iyo ka hamatag ah.</p>	
<p><b>Adeegyada lafdhabarta*</b></p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada soo socda: <span style="float: right;">\$0</span></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• hagaajinta lafdhabarta si loo toosiyo</li> <li>• hal qiimayn ama baaritaan sanad kasta</li> <li>• hagaajinta gacanta (habaynta) ee lafdhabarta si loo daaweeyo xubnaha lafdhabarta oo kala baxa - ilaa 24 daawaynood sanad kasta, oo ku xaddidan lix bishii. Daawaynta ka badan 24 sanad kasta ama lix bishiiba waxay u baahan yihiin ogolaansho hore.*</li> <li>• raajooyinka marka loo baahdo si loo taageero ogaanshaha subluxation ee lafdhabarta</li> </ul> <p><b>Fiiro gaar ah:</b> Qorshahayagu ma daboolayo hagaajinta kale, fiitamiinnada, sahayda caafimaadka, daawaynta, ama qalabka laga helo dhakhtarka daaweynta lafaha.</p> <p>Waxaan sidoo kale gunnooyinka dheeri ah oo daaweynta lafaha ah siinaa xubnaha qaba xanuunada muruqyada.</p> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	

**?** **Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada lafdhabarta* (waa socdaa)</b></p> <p>Caymis waxa ku jira adeegyo dheeraad ah oo ka baxsan kuwa kor ku taxan ama aanay daboolin Medical Assistance. Xaddidaayo caymis oo dheeraad ah ayaa laga yaabaa inay khuseeyaan. kuwan waxaa kamida:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• ilaa 12 booqashooyinka joogtada ah ee xanuunka lafaha iyo muruqyada sanadkiiba. Waxaa ku jira baaritaanno iyo daawaynta xag-jirnimada</li> </ul>	
<p> <b>Baaritaanka kansarka mindhicirka</b></p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada soo socda: <span style="float: right;">\$0</span></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Baaritaanka caloosha/Colonoscopy ma laha xaddidaada ugu yar ama ugu badan da'da waxaana la daboolaa hal mar 120 bilood (10 sano) bukaanada aan khatarta sare lahayn, ama 48 bilood kadib marka baaritaanka hore oo dabacsan ee mindhicirka lagu sameeyo bukaanada aan khatarta sare ugu jirin kansarka mindhicirka, iyo hal mar 24 kasta oo loogu talagalay bukaanada khatarta sare leh ka dib baarista walamadka hore ama 'barium enema'</li> <li>• Baaritaanka dabacsan ee mindhicirka oo loogu talagalay bukaanada 45 sano iyo ka weyn. Hal mar 120 biloodba bukaanada aan halis sare ugu jirin ka dib marka bukaanku helo baarista walamadka. Hal mar 48 biloodba bukaanada khatarta sare leh ee ka imanaya baaritaanka dabacsan ee mindhicirka ee ugu dambeeyay.</li> <li>• Baadhitaannada dhiigga saxarada ee bukaanka 45 sano iyo ka weyn. Hal mar 12 biloodba.</li> <li>• DNA-ga Saxarada ee bukaanada 45 ilaa 85 da'da oo aan buuxin shuruudaha khatarta sare leh. Hal mar 3 sanaba.</li> <li>• Tijaabooyinka dhiigga-ku-salaysan ee loogu talagalay bukaannada 45 ilaa 85 da'doodu tahay oo aan buuxin shuruudaha khatarta sare leh. Hal mar 3 sanaba.</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Baaritaanka kansarka mindhicirka (waa socotaa)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• 'Barium Enema' oo ah beddelka baarista walamadka ee bukaanka khatarta sare leh iyo 24 bilood laga soo bilaabo baadhistii ugu dambaysay ee 'barium enema' ama baarista walamadka ee u dambaysay.</li> <li>• 'Barium Enema' sida beddelka baaritaanka dabacsan ee mindhicirka ee loogu talagalay bukaannada aan khatarta sare ugu jirin iyo 45 sano ama ka weyn. Hal mar ugu yaraan 48 bilood ka dib baadhistii ugu dambaysay ee 'barium enema' ama baaritaanka dabacsan ee mindhicirka.</li> </ul> <p>Baaritaannada kansarka mindhicirka waxaa ka mid ah baarista walamadka ee dabagalka ah ka dib marka Medicare uu daboolo Baaritaanka kansarka mindhicirka ee saxarada ku salaysan ee aan fiicneyn ayaa soo celisa natiijo wanaagsan.</p>	
<p><b>Adeegyada ilkaha</b></p> <p>Adeegyada ilkaha qaarkood, oo ay ku jiraan nadiifinta, buuxinta, iyo ilko-gashiga, ayaa laga heli karaa Barnaamijka Kaalmada Caafimaadka ee Ilkaha.</p> <p>Adeegyada la daboolay:</p> <p>Adeegyada baaritaanka:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• baaritaan dhamaystiran (shantii sano ee kasta) (lama samayn karo isla taariikhda ka qiimaynta xilliyeed ama qiimayn xaddidan ahaan)</li> <li>• baaritaan wakhtiyeed hal mar ah sanadkii (lama samayn karo isla taariikhda ka qiimayn xadidan ama dhamaystiran ahaan)</li> <li>• baaritaanada xaddidan (dhibaatooyinka diiradda saaraya) (hal mar maalintii) (lama samayn karo isla taariikhda la mid ah qiimayn xilliyeedka ama qiimayn afka ah ama</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	<p>\$0</p>



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada ilkaha (sii socda)</b></p> <p>adeega nadiifinta ilkaha oo dhamaystiran)</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• qiimayn afka ah oo faahfaahsan (lama samayn karo isla taariikhda afka unugyada buuxa laga soo saaray)</li> <li>• qiimaynta qaabka ilkaha (lama samayn karo isla taariikhda afka unugyada buuxa laga soo saaray)</li> <li>• daryeelka ilkaha ee casriga ah ee adeegyada ogaanshaha cillada</li> <li>• adeegyada sawir-qaadista, oo ku xaddidan: <ul style="list-style-type: none"> <li>– Sawirida ilkaha (sanadkii hal mar)</li> <li>– hal raajo si loo ogaado dhibaatooyinka (afar taariikhda adeegga kasta)</li> <li>– muuqaalka dhinacyada badan (Shantii sanaba hal mar iyo sida caafimaad ahaan loogu baahdo; Labadii sanoba mar xaaladaha xaddidan; ama leh tas-hiilaad bukaan-socod la qorsheeyay ama xarunta qalliinka ee wareegta ee bilaashka ah (ASC))</li> <li>– raajo afka oo dhamaystiran (hal mar muddo shan sano ah)</li> </ul> </li> </ul> <p>Adeegyada ka hortagga:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• nadiifinta ilkaha oo (ku xaddidan laba jeer sannadkii; ilaa ilaa afar jeer sannadkii haddii caafimaad ahaan loo baahdo)</li> <li>• fluoride varnish (hal mar lixdii biloodba mar) (lama samayn karo isla taariikhda daawaynta degdega ah ee adeega xanuunka ilkaha)</li> <li>• shaabadeynta loogu talagalay carruurta ka yar da'ada 21 (shantii sanaba hal gaws oo joogto ah)</li> <li>• dawaynta ciridka (halkii mar hal ilig 6 biloodba)</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada ilkaha (sii socda)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• tilmaamaha nadaafadda afka</li> </ul> <p>Adeegyada soo celinta:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• buuxinta waxay ku xaddidan tahay hal mar 90-kii maalmood ilig kasta</li> <li>• buuxinta xanun yaraynta ah si loo yareeyo xanuunka (lama samayn karo isla taariikhda daawaynta degdega ah ee adeega xanuunka ilkaha)</li> <li>• jirida iliga ee kali ah (waa in laga sameeyaa bir laysu keenay oo aan daxalaysan ama walxaha lagu badalo ilkaha qurmay)</li> </ul> <p>Daaweynta cudurada gudaha ilkaha (kanaalada xididdada ilkaha) (halmar ilig kasta nolasha oo dhan)</p> <p>Qalniinka Afka</p> <p>Daaweynta qaab la'aanta ilkaha (kaliya marka caafimaad ahaan lagama maarmaanka u tahay xaaladaha aadka u xaddidan)(marka la helo Ogolaansho Hore)</p> <p>Daaweynta unugyada ku hareeraysan ilkaha:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• saarida guud ee huurada iyo daxalka ilkaha (ka saarida unugyada waxyeelobay ee afka oo dhan) (shantii sanaba hal mar) (lama samayn karo isla taariikhda adeegga nadiifinta ilkaha, baaritaanka dhamaystiran, qiimaynta afka ama xilliga adeega qiimaynta)</li> <li>• xoqin iyo xidid goynta (lama samayn karo isla maalinta nadiifinta ilkaha ama nadiifinta afka ee dhamaystiran) (hal mar labadii sanaba mar afartiiba)</li> <li>• Habraaca/qalliinka dabagalka ah (nadiifinta ilkaha) (saddex bilood oo kasta/91 maalmood ilaa labba sano) (ilaa jadwalka sanadkiib ka dib dhammaystirka ka jarida lakabyada guudka iliga iyo soo saarida jirada iliga)</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada ilkaha (sii socda)</b></p> <p>Samaynta ilko macmal ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• qalabyada la saari karo (waxyabaha ilkaha lagu xajiyo iyo qaybaha kale) (hal qalab saddexdii sanaba mar ee ilko kasta)</li> <li>• hagaajinta, wax ka beddelka, dib-u-habaynta, dayactirka, iyo dib-u-dhigista qalabyada la saari karo (ilig-hayaha iyo qaybaha kale), (dayactirka ilkaha maqan ama jabay waxay ku xaddidan yihiin shan ilig 180-kii maalmoodba)</li> <li>• bedelida qalabyada ilkaha lagu xajiyo ee lumay, la xaday, ama waxyeelobay oo aan la hagaajin karin xaaladaha qaarkood</li> <li>• bedelida qalabyada ilkaha haddii qalabyada hadda jira aan wax-ka-bedel lagu samayn karin si loo daboolo baahida ilkaha</li> <li>• xadhkaha habaynta unogyada</li> <li>• lifaaqyada saxda ah iyo adeegyada</li> </ul> <p>Dheeraadka ah ee hagaajinta ilkaha</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• daawaynta degdega ah ee xanuunka ilkaha (hal mar maalintii)</li> <li>• suuxinta guud, suuxdin qotada dheer</li> <li>• xarunta daryeelka ee la kordhiyay/wacitaanka guriga ee goobaha hay'adaha qaarkood oo ay ku jiraan: xarumaha daryeelka, xarumaha kalkaalinta ee xirfada leh, guryaha daryeelka ee hoyga ah, Machadyada Cudurada Dhimirka (IMD), Xarumaha Daryeelka Dhexdhexaadka ah ee Dadka Naafada Koriinka Qaba (ICF/DDs), Guryaha Nasinta/Xannaanada, Xulashooyinka Daaweynta Dheeraadka ah ee Minnesota (METO), iyo sariiraha lulma (sariiraha kalkaalinta caafimaad ee yaala isbitaalka) (lama samayn karo isla taariikhda adeegga tilmaamaha nadaafadda afka)</li> <li>• maaraynta habdhaqanka marka loo baahdo si loo xaqiijiyo in adeega ilkaha ee la daboolay si sax ah oo badbaado leh loo fuliyay</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	





**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada ilkaha (sii socda)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• daawooyin (kaliya marka caafimaad ahaan lagama maarmaanka u tahay xaaladaha aadka u xaddidan)</li> <li>• gaaska naytaras oksaydh (kaliya haddii adeega ilkaha ee la daboolay uu yahay mid aan loo samayn karin si badbaado leh gaaskaas la'aantiisa ama haddii kale uu u baahdo adeega in lagu sameeyo suuxinta guud ee isbitaal ama xarun qalliin)</li> <li>• hagaajinta qaniinyada afka (waxay ku xaddidan tahay hal mar maalintii)</li> <li>• Suuxinta Afka ama Daren Dilida IV (kaliya haddii adeega ilkaha ee la daboolay uu yahay mid aan loo samayn karin si badbaado leh gaaskaas la'aantiisa ama haddii kale uu u baahdo adeega in lagu sameeyo suuxinta guud ee isbitaal ama xarun qalliin)</li> </ul> <p><b>Fiiro gaar ah:</b></p> <p>Haddii aad doorato in aad gunnooyinka ilkaha ka hesho Xarunta Caafimaadka ee Dowliyan U-qalma (FQHC) ama rugta caafimaadka ilkaha ee ay dawladu maamusho, waxaad heli doontaa isla gunnooyinka aad xaqa u leedahay ee hoos yimaada Medical Assistance (Medicaid).</p> <p>Haddii aad ku cusub tahay qorshahayaga caafimaadka oo aad horeba u bilowday qorshaha daawaynta adeegga ilkaha, fadlan nala soo xiriir si aad u hesho iskuduwidda daryeelka.</p> <p>Haddii aad bilowdo adeegyada simitaanka ilkaha, uma baahnaan doonno dhamaystirka qorshaha daawaynta si aan lacag bixiyaha ugu bixinno adeegyada lagu helo.</p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada daryeelka ilkaha qaarkood marka adeeggu uu yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah daawaynta gaarka ah ee ka faa'iidaystaha xaaladdiisa caafimaad ee aasaasiga ah. Tusaalooyinka qaarkood waxaa ka mid ah dib-u-dhiska daanka kadib jab ama dhaawac soo gaaray, soo saarista iliga oo la sameeyo si loogu diyaariyo daaweynta</p> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	





**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada ilkaha (sii socda)</b></p> <p>shucaaca ee kansarka ku lug leh daanka, ama baaritaan afka ah oo ka horreeya tallaalka kelyaha. oo ay ku jirto daanka, ama baaritaanka afka ayadoo loo gudbayo beerista kelida.</p> <p>Waxa kale oo aanu bixinaa gunnooyinka ilkeed oo dheeri ah sanadkiiba qaar ka mid ah adeegyada dheeraadka ah ee ka baxsan waxa kor ku taxan ama aanay daboolin Kaalmada Caafimaadka. Xaddidaayo caymis oo dheeraad ah ayaa laga yaabaa inay khuseeyaan. kuwan waxaa kamida:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Laba galaas oo lagu xirey madax bir ah oo sarreeya sannad kasta</li> <li>• Hal dayacdir oo madaxa ilkaha ah sanad kasta</li> <li>• Hal caday oo koronto ku shaqeeya saddexdii sanaba mar</li> <li>• Hal xirmo oo ah laba madax oo beddela cadayga korontada ku shaqeeya sannadkiiba</li> </ul>	<p>\$0</p>
<p> <b>Baaritaanka Niyadjabka</b></p> <p>Waxaan bixinaa hal baaritaan oo niyad jab sanad walba. Baaritaanku waa in lagu sameeyo goob daryeelka aasaasiga ah oo bixin karta daawaynta dabagalka iyo gudbinta.</p> <p>Waxaa laga yaabaa inaan daboolno baaritaanno dheeri ah haddii caafimaad ahaan loo baahdo.</p>	<p>\$0</p>
<p> <b>Baaritaanka Sokoroawga</b></p> <p>Waxaan bixinaa kharashka baaritaankan (oo ay ku jiraan baaritaanka gulukooska soonka) haddii aad leedahay mid ka mid ah arrimahan halista ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• caddaadiska dhigga oo sareeya (dhiigkar)</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	<p>\$0</p>


**?** **Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Baaritaanka Sokorowga (sii socda)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• taariikhda kolestaroolka iyo heerarka ‘triglyceride’ aan caadiga ahayn (dyslipidemia)</li> <li>• cayilka</li> <li>• taariikhda sonkorta dhiiga oo sareysa (glucose)</li> </ul> <p>Baaritaanada waxaa laga yaabaa in lagu daboolo xaaladaha kale qaarkood, sida haddii aad miisaan culus tahay oo aad leedahay taariikh qoys oo sonkorow ah.</p> <p>Waxaa laga yaabaa in aad u qalanto ilaa labo baaritaan oo cudurka sokorowga ah 12 bilood ee kasta ayada oo la raacayo taariikhdiis ugu dambaysay ee baaritaanka cudurka sokorowga.</p> <p>Waxaa laga yaabaa inaan daboolno baaritaanno dheeri ah haddii caafimaad ahaan loo baahdo.</p>	
<p> <b>Tababarka is-maamulidda sonkorowga, adeegyada iyo saadka</b></p> <p>Waxaan adeegyada soo socda siinaa dhammaan dadka qaba cudurka macaanka (haddii ay isticmaalaan insulin ama haddii kale):</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Alaabta lagula socdo gulukoosta dhiiggaaga, oo ay ku jiraan kuwan soo socda: <ul style="list-style-type: none"> <li>– kormeeraha gulukoosta dhiiga</li> <li>– istiribyada baaritaanka gulukooska dhiiga</li> <li>– qalabyada lancet-ka iyo lancet-yada laftooda</li> <li>– dareerayaasha xakamaynta gulukoosta ee lagu hubinayo saxnaanta aalada iyo kormeerida</li> </ul> </li> <li>• Dadka qaba cudurka sonkorowga ee qaba cudurka cagta ee sonkorowga daran, waxaan siinaa waxyaabaha soo socda:</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	\$0



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Tababarka is-maamulidda sonkorowga, adeegyada iyo saadka (sii socda)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>– hal kabo oo habaysan oo daweyn ah (ay ku jiraan kuwa la gashado), oo ay ku jiraan ku-habboonaanta, iyo laba kale oo dheeraad ah sannad kasta, <b>ama</b></li> <li>– hal kabo oo qoto dheer, oo ay ku jiraan ku habboonaanta, iyo saddex xabo oo la geliyo sannad kasta (kuma jiraan kuwa la gelin karo ee aan la beddeli karin ee lala bixiyo kabahaas)</li> <li>• Xaaladaha qaarkood waxaan bixinaa kharashka tababarka si aan kaaga caawino inaad maareyso cudurkaaga sonkorowga. Si aad wax badan u ogaato, la xiriir Adeegga Macaamiisha.</li> </ul>	
<p><b>Qalab caafimaad oo waara (DME) iyo sahayda la xidhiidha*</b></p> <p>Tixraac <b>Cutubka 12</b> ee <i>Member Handbook</i> si aad u qeexo “qalabka caafimaadka ee waara (DME).”</p> <p>Waxaan dabooli doonaa waxyaabaha soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• kuraasta curyaanka</li> <li>• biraha lugaha</li> <li>• nidaamyada joodariga ku shaqeeya</li> <li>• sahayda xanuunka cudurka sonkorowga (Si aad u aragto sahayda cudurka sonkorowga tixraac qaybta “tababarka, adeegyada, iyo sahayda iska maareynta cudurka macaanka” ee shaxda gunnooyinka.)</li> <li>• sariiraha isbitaalka oo uu dalbaday adeeg bixiyayaasha si loogu isticmaalo guriga</li> <li>• bambooyinka faleebada xididada (IV) iyo tiir</li> <li>• aaladaha hadalka dhaliya</li> <li>• qalabka ogsijiinta iyo saadka</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	<p>\$0</p>



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Qalab caafimaad oo waara (DME) iyo sahayda la xidhiidha* (sii socota)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• agabka neefsiga</li> <li>• qalabka socodka</li> <li>• gacan qalooca caadiga ah ama bakooraad afar gees ah iyo agabka beddelka</li> <li>• iidaashada afka ilmagaaleenka (albaabka dushiisa)</li> <li>• kicinta lafaha</li> <li>• qalabka daryeelka sifeynta kelyaha</li> </ul> <p>Waxaan daboolnaa waxyaabo dheeraad ah, oo ay ku jiraan:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• dayactirka qalabka caafimaadka</li> <li>• baytariyada qalabyada caafimaadka</li> <li>• qalabyada nadiifinta neefmareenka</li> <li>• qalabyada caafimaadka aad u baahan tahay si aad u daryeesho jirradaada, dhaawacaaga ama naafadaada</li> <li>• alaabta loogu talagalay kaadi ceshad la'aanta</li> <li>• alaabta nafaqada/mareenka marka shuruudo gaar ah la buuxiyo</li> <li>• Qalabyada qorsheynta qoyska (ka eeg qaybta “adeegyada qorsheynta qoyska” ee jaantuskan wixii macluumaad dheeraad ah)</li> <li>• aaladaha isgaarsiineed, oo ay ku jiraan kaniiniyada elektarooniga ah</li> <li>• qalabyada lagu ogaado qalalka</li> </ul> <p>Alaab kale ayaa laga yaabaa in caymiska uu daboolo</p> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Qalab caafimaad oo waara (DME) iyo sahayda la xidhiidha* (sii socota)</b></p> <p>Waxaan bixinaa dhammaan DME-da caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah ee Medicare iyo Kaalmada Caafimaadka ay inta badan bixiyaan. Haddii alaab-qeybiyahayaga aaggaaga uusan wadan calaamad gaar ah ama sameeye, waxaad waydiin kartaa haddii ay si gaar ah kuugu dalbi karaan.</p>	
<p><b>Adeegyada Wax-ka-qabadka Koriinka iyo Habdhaqanka (EIDBI) *</b> (loogu talagalay xubnaha ka yar da'ada 21)</p> <p>Ujeedada dheefaha EIDBI waa in la bixiyo caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah, hamae iyo ka hamatagga degdega ah ee dadka qaba Cudurka Ootiisamka (ASD) iyo xaaladaha la xiriira. Qoysasku waxay wax badan ka baran EIDBI iyagoo qaadanay tababarka onlaynka ah ee <a href="#">EIDBI 101</a>.</p> <p>Qoysasku waxay wax badan ka baran karaan ootiisamka, siiba ilaha iyo taageerooyinka, iyagoo booqanaya Bogga Madasha Ootiisamka ee Minnesota (<a href="https://mn.gov/autism/">https://mn.gov/autism/</a>).</p> <p>Dheefaha waxaa sidoo kale loogu talagalay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• In wax lagu baro, lagu tababar oo lagu taageero waalidiinta iyo qoysaska</li> <li>• Lagu hamamariyo madax-bannaanida dadka iyo ka qaybgalka qoyska, dugsiga iyo nolosha bulshadda</li> <li>• Lagu hamamariyo natiijooyinka mustaqbalka fog iyo tayada nolosha dadka iyo qoysaskooda.</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	\$0



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada Farogelinta Koriinka iyo Habdhaqanka ee Hore (EIDBI)*</b> (loogu talagalay xubnaha ka yar da'da 21) <b>(sii socota)</b></p> <p>Adeegyada EIDBI waxaa bixiya daryeel bixiyeyaasha EIDBI ee ka diiwaan gashan kuwaas oo khibrad u leh hababka la ansixiyay oo ay ka mid yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Falanqaynta Habdhaqanka (ABA)</li> <li>• Horumarin, Isbedel Shaqsiyaded Moodhelka Xiriirka Ku Salaysan (DIR)/Floortime</li> <li>• Moodhelka Bilowga Hore ee Denver (ESDM)</li> <li>• Mashruuca PLAY</li> <li>• Wax-ka-qabadka Koboca Xiriirka (RDI)</li> <li>• Isdhexgalka Hore ee Bulshada (ESI).</li> </ul> <p><a href="https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-TreatmentModalities">https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-TreatmentModalities</a></p> <p>Adeegyada La Daboolay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qiimaynta Dhinacyada Badan ee Dhammaystiran (CMDE) taas oo loogu baahan yahay in go'aan laga gaadho u qalmida iyo baahida caafimaadka ee adeegyada EIDBI (<a href="https://www.dhs.state.mn.us/CMDE">https://www.dhs.state.mn.us/CMDE</a>).</li> <li>• Hormarinta Qorshaha Daaweynta Shakhsi Ahaaneed (ITP) (koowaad)</li> <li>• Hormarinta Qorshaha Daaweynta Shakhsi Ahaaneed (ITP) iyo Kamajoogteynta Hormarka (<a href="http://www.dhs.state.mn.us/ITP">www.dhs.state.mn.us/ITP</a>)</li> <li>• Farogelinta Tooska ah: Shakhsiyeed, kooxeed, iyo/ama xajmi sare (<a href="https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-DirectIntervention">https://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-DirectIntervention</a>)</li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada Faragelinta Koriinka iyo Habdhaqanka ee Hore (EIDBI)*</b> (loogu talagalay xubnaha ka yar da'da 21) <b>(sii socota)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Wax-ka-qabashada Kormeerida iyo Tilmaamida (<a href="http://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-ObservationandDirection">www.dhs.state.mn.us/EIDBI-ObservationandDirection</a>)</li> <li>• Latalinta iyo Tababarka Qoyska/Daryeel-bixiyaha: Shaqsiyeed iyo/ama Kooxeed (<a href="http://www.dhs.state.mn.us/EIDBI-CaregiverTrainingandCounseling">www.dhs.state.mn.us/EIDBI-CaregiverTrainingandCounseling</a>)</li> <li>• Shirka Daryeelka La Iskuduway (<a href="https://www.dhs.state.mn.us/main/idcplg?IdcService=GET_DYNAMIC_CONVERSION&amp;RevisionSelectionMethod=LatestReleased&amp;dDocName=dhs16_195209">https://www.dhs.state.mn.us/main/idcplg?IdcService=GET_DYNAMIC_CONVERSION&amp;RevisionSelectionMethod=LatestReleased&amp;dDocName=dhs16_195209</a>)</li> <li>• Wakhtiga Safarka</li> </ul>	
<p><b>Daryeelka degdega ah</b></p> <p>Daryeelka degdega ah waxa loola jeedaa adeegyada ay yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• uu bixiyo adeeg-bixiye u tababaran inuu bixiyo adeegyada degdega ah, <b>Iyo</b></li> <li>• loo baahan yahay in lagu daweyo xaalad degdeg ah oo caafimaad.</li> </ul> <p>Xaalad degdeg ah oo caafimaad waa xaalad caafimaad oo leh xanuun daran ama dhaawac halis ah. Xaaladdu ay aad ayay halis u tahay, oo haddii aysan helin daryeel caafimaad oo degdeg ah, qof oo celcelis ahaan aqoonta caafimaadka iyo daawadu u leeyahay wuxuu filan karaa inay ka dhalan karto:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• khatar weyn oo ku aadan caafimaadkaaga ama caafimaadka ilmahaaga aan weli dhalan; <b>ama</b></li> <li>• khatarta wayn ku leh shaqada jiekaaga; <b>ama</b></li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	<p style="text-align: right;">\$0</p> <p>Haddii aad daryeel degdeg ah ka hesho cisbitaal ka baxsan shabakadda oo aad u baahan tahay daryeelka bukaan-jiif ka dib markii xaaladda degdegga ah la dejiyo, waa inaad ku noqotaa cisbitaal shabakadeed si daryeelkaagu u sii socdo. in lagu bixiyo. Waxaad joogi kartaa gudaha isbitaalka ka baxsan shabakadaada adigoo ka helaya daryeelkaaga bukaan-jiifka kaliya haddii qorshahayagu oggolaado joogitaankaaga.</p>

**?** **Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Daryeelka degdega ah (waa socotaa)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• cillad daran oo ka jirta xubin ama qayb ka mid ah jirka</li> <li>• Xaaladda haweeney uur leh oo fool ku jirta, marka: <ul style="list-style-type: none"> <li>– Ma jirto wakhti ku filan oo lagugu wareejin karo isbitaal kale ka hor dhalmada.</li> <li>– U wareejinta isbitaal kale waxay keeni kartaa khatar ku aadan caafimaadkaaga ama badbaadadaada ama tan ilmahaaga aan weli dhalan.</li> </ul> </li> </ul> <p>Caymiskan waxa kaliya oo laga heli karaa gudaha Maraykanka iyo dhulalkiisa.</p>	
<p><b>Booqashooyinka khadka tooska ah</b></p> <p>Waxaan daboolnaa booqashooyinka internetka- si ku habboon oo lagu helo ogaanshaha internetka iyo daaweynta xaaladaha yaryar lacag la'aan. Adeegyadan waxaa la heli karaa 24/7, ballan la'aan, iyada oo loo marayo virtuwel<sup>®</sup> oo laga helo <a href="http://virtuwel.com">virtuwel.com</a> iyo nidaamyada kale ee daryeelka shabakada UCare ee bixiya booqashooyinka khadka ah ee E-visits.</p> <p>Fadlan ka eeg cutubka 12 si aad u qeexo booqashada internet ahaaneed.</p>	<p>\$0</p>
<p><b>Adeegyada qorsheynta qoyska</b></p> <p>Sharcigu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad doorato adeeg-bixiye kasta ha ahaado adeeg-bixiye ku jira shabakadda ama adeeg-bixiye shabakadda ka baxsan – si aad uga hesho adeegyada qorshaynta qoyska qaarkood. Kuwaas waxa loo yaqaan adeegyada gelitaanka furan. Taas macnaheedu waa dhakhtar kasta, rug kasta, isbitaal, farmashiye, ama xafiiska qorsheynta qoyska.</p> <p>Waxaan bixinaa adeegyada soo socda:</p> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	<p>\$0</p>


**?** **Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p><b>Adeegyada qorsheynta qoyska (sii socda)</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• baaritaanka qorsheynta qoyska iyo daaweynta</li> <li>• shaybaarka qorsheynta qoyska iyo baaritaannada cudureed</li> <li>• hababka qorshaynta qoyska (IUC/IUD, qalliinada, irbado, kaniiniyada ilaalinta uurka, balastar, ama giraanta)</li> <li>• qalabyada qorsheynta qoyska oo leh warqad dhakhtar (kondom, isbuunyo, xumbo, filim, dhaayafaraam, dabool)</li> <li>• kala talinta iyo ogaanshaha dhalmo la'aanta iyo adeegyada la xiriira</li> <li>• la-talinta, baaritaanka iyo daawaynta cudurada galmada la isku qaadsiiyo (STIs)</li> <li>• kala-talinta iyo baaritaanka HIV iyo AIDS-ka, iyo xaaladaha kale ee la xiriira HIV</li> <li>• Ka-hortagga uur-qaadidda joogtada ah (Waa inaad jirtaa 21 ama ka weyn tahay si aad u doorato habkan qorsheynta qoyska. Waa inaad saxiixdaa foomka ogolaanshaha ee federaalka ugu yaraan 30 maalmood, laakiin aan ka badnayn 180 maalmood ka hor taariikhda qalliinka.)</li> <li>• kala talinta hidda-sidaha</li> </ul> <p>Waxaan sidoo kale bixinaa qaar ka mid ah adeegyada qorsheynta qoyska. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad u isticmaashaa adeeg-bixiye ku jira shabakad si aad u hesho adeegyadan soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• daawaynta xaaladaha caafimaad ee dhalmo la'aanta (Adeeggan kuma jiraan habab macmal ah oo uur ku yeelan karo.)</li> <li>• daaweynta AIDS-ka iyo xaaladaha kale ee la xiriira HIV</li> <li>• baaritaanka hidda-sidaha</li> </ul>	



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo	Waxa ay tahay in aad bixiso
<p> <b>Barnaamijyada waxbarashada caafimaadka iyo faydaqabka</b></p> <p>UCare waxay u fidisaa xubnaha u qalma barnaamijyo si loo horumariyo caafimaadkaaga iyo ladnaantaada. Si aad wax badan u barato gal ama akoon ka samayso khadka <b>member.ucare.org</b>. Tag qaybta Health &amp; Wellness (Caafimaadka &amp; Fayo-qabka), kadibna Wellness, Rewards &amp; Allowance (Fayo-qabka, Gunnooyinka &amp; Baqshiishyada). Ama booqo <b>ucare.org/healthwellness</b>. Wac Adeegga Macmiilka ama la hadal isku-duwaha daryeelkaaga wixii faahfaahin dheeraad ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Aalada La Socodka Dhaqdhaqaaqa sida fudud loo isticmaali karo oo lagu daray aaladda Nidaamka Ka jawaabida Degdegga ah ee Shakhsi ahaaneed (PERS). <ul style="list-style-type: none"> <li>– Adeeg bixinta 24/7 ee wicitaanka caawinta degdega ah si toos ah saacadda wakiil taageero</li> <li>– Ka caawinta inaad gaarto yoolalkaaga caafimaad tillaabooyinka iyo la socodka garaaca wadnaha</li> <li>– Ka shaqaynta meel kasta oo aad tagto - gudaha iyo dibadda gurigaaga oo leh GPS-ku-dhismay</li> <li>– Smartwatch waa aalad diyaar u ah in la isticmaalo isla marka laga soo bixiyo sanduuqa iyada oo aan loo baahnayn in la rakibo ama lagu xiriiriyo taleefanka gacanta ama Wi-Fi. Si aad wax badan uga ogaato oo aad u aragto inaad u qalanto, la xiriir care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga) SNBC.</li> </ul> </li> <li>• Qalabka Kormeerida Cadaadiska Dhiiga <ul style="list-style-type: none"> <li>– Loogu talagalay xubnaha qaba dhiigkar kuwaas oo durba isticmaala Aalada Kormeerka iyo Ka jawaabida Degdegga ah ee Shakhsi ahaaneed (PERS). Si aad wax badan uga ogaato oo aad u aragto inaad u qalanto, la xiriir care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga) SNBC.</li> </ul> </li> <li>• Gunnada Waxbarashadda Bulshadda <ul style="list-style-type: none"> <li>– Xubnaha waxay helaan \$100 sadexdii biloodba mar si ay ugu baxshaan casharada waxbarashada bulshada intooda badan ee wadanka oo dhan. Si aad u hesho</li> </ul> </li> </ul> <p style="text-align: center;"><b>Dheefahani waxay ku sii socotaa bogga xiga</b></p>	\$0



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

**Adeegyada uu qorshahayagu bixiyo****Waxa ay tahay in aad bixiso****🍏 Barnaamijyada waxbarashada caafimaadka iyo fayoaqabka (oo socda)**


cashar, ka fiiri buug-yaraha waxbarashada bulshada ama la xiriir dugsiga degmada si aad u hesho wakhtiyada iyo goobaha casharka. Marka aad iska diiwaangelinayso cashar, isticmaal kaarkaaga Healthy Benefits+ Visa<sup>®</sup> marka aad lacagta u dhiibayso qof ahaan, adigoo isticmaalaya taleefan ama ka bixinaya khadka. Gunnada ayaa dhacaysa dhammaadka sadexdii bilood kasta ama kadib marka la joojiyo qorshaha. Kaarku ma shaqayn doono haddii aadan UCare xubin ka ahayn. UCare ayaan magdhowi doonin qarashaadka casharada kharashkooda la baxshay ayadoon aan la adeegsan kaarka Healthy Benefits+ Visa<sup>®</sup>.

- Si aad wax badan uga ogaato ama aad u hubiso haraaga kaarkaaga booqo [healthybenefitsplus.com/ucare](http://healthybenefitsplus.com/ucare) ama wac 1-833-862-8276 (wacitaanka waa bilaash); TTY 711 (wacitaanka waa bilaash). Lambarka taleefankani wuxuu sidoo kale ku yaal dhabarka dambe ee kaarka UCare Healthy Benefits+ Visa<sup>®</sup>.
- Abaalmarinta iyo Dhiirigelinta
Haddii daawada A **kuuma** shaqaynayso, markaa waxaanu daboolnaa Dawooyinka B. Tan waxa loo yaqaan daawaynta tallaabo.

## 4. Xadadka tayoooyinka

Dawooyinka qaarkood, waxaanu xadidnaa qadarka dawada aad haysato. Tan waxaa loogu yeedhaa xadka dawada. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan xaddidno inta ay le'eg tahay daawada aad heli karto mar kasta oo aad buuxiso riijeetada.

Si aad u ogaato haddii wax sharciyada kor ku xusan lagu dabaqi karo dawo aad qaadato ama aad doonayso inaad qaadato, eeg *Drug List (Liiska Dawooyinka)* Si aad u hesho macluumaadka ugu casrisan, wac Adeegga Macmiilka ama ka hubi websaydkayaga [ucare.org/dsnp-druglist](http://ucare.org/dsnp-druglist). Haddii aadan ku raacsanayn go'aankayaga caymiska ee ku salaysan mid ka mid ah sababaha kor ku xusan waxaad codsan kartaa racfaan. Fadlan tixraac **Cutubka 9** ee *Member Handbook*.

## D. Sababaha dawadaadu aan loo daboolayn

Waxaan isku dayeynaa inaan ka dhigno caynsanaanta daawadu inay si fiican kuugu shaqeyso, laakiin mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaan daawadu loo daboolin sida aad jeceshahay. Tusaale ahaan:

- Qorshaheena ma daboolayo daawada aad rabto inaad qaadato. Daawadu waxa laga yaabaa inaanay ku jirin *Drug List (Liiska Dawooyinka)* Waxaa laga yaabaa inaan daboolno nooc guud oo daawada ah laakiin ma dabooli karno nooca magaca astaanta aad rabto inaad qaadato. Daawadu waxay noqon kartaa mid cusub, walina uma aynaan eegin badbaadada iyo waxtarkeeda.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Qorshaheena waxa uu daboolaa dawada, laakiin waxa jira xeerar gaar ah ama xadidaad caymis. Sida lagu sharraxay qaybta sare, Qaybta C, daawooyinka qaar ee qorshaheenu daboolo waxay leeyihiin sharciyo xaddidaya isticmaalkooda. Xaaladaha qaarkood, adiga ama dhakhtarkaaga ayaa laga yaabaa inaad rabto inaad na waydiiso ka reeban.

Waxaa jira waxyaabo aad sameyn karto haddii aanaan u daboolin daawada sida aad rabto inaan u daboolno.

## D1. Helitaanka sahay ku meelgaar ah

Xaaladaha qaarkood, waxaanu ku siin karnaa dawo ku meelgaar ah marka aanay daawadu ku jirin *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ama ay si uun u xaddidan tahay. Tani waxay ku siinaysaa wakhti aad kala hadasho adeeg bixiyahaaga sidii aad u heli lahayd daawo kale ama aad na waydiiso inaanu daboolno daawada.

**Si loo helo saad ku meel gaadh ah oo dawada ah, waa inaad buuxisaa labbada sharci ee hoose:**

1. Daawooyinka aad qaadanaysay:
  - laga saaray *Drug List (Liiska Dawooyinka)* **ama**
  - Waligeedba aysan ku jirin *Drug List (Liiska Dawooyinka)* **ama**
  - Hadda ay si uun u xaddidan tahay.
2. Waa inaad ku jirtaa mid ka mid ah xaaladahan:
  - Aad ku jirtay qorshaheena sannadkii hore.
    - Waxaanu daboolnaa sahayda ku meelgaarka ah **inta lagu guda jiro dawadaada 90 maalmood ee ugu horeeya sanadka kalandarka.**
    - Sahaydan ku meelgaarka ahi waa ilaa 30 maalmood.
    - Haddii warqadda dawada lagu qoray maalmo intaas ka yar, waxaanu oggolaanaynaa in dib-u-buuxin badan lagu siiyo ugu badnaan 30 maalmood oo daawo ah. Waa inaad Kansaa ka qayb galka xaga shabakada farmasiiga.
    - Farmasiiyada daryeelka xiliga dheer waxay bixin karaan dawo qorida qaybo yaryar ah wakhtigiiba si looga hortaggo khasaaraha.
  - Aad ku cusub tahay qorshaheena.
    - Waxaan daboolnaa sahayda ku meelgaarka ah **inta lagu guda jiro dawadaada 90 maalmood ee ugu horreeya xubnimadaada qorshaheena.**
    - Sahaydan ku meelgaarka ahi waa ilaa 30 maalmood.
    - Haddii warqadda dawada lagu qoray maalmo intaas ka yar, waxaanu oggolaanaynaa



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

in dib-u-buuxin badan lagu siiyo ugu badnaan 30 maalmood oo daawo ah. Waa inaad Kansaa ka qayb galka xaga shabakada farmasiiga.

- Farmasiiyada daryeelka xiliga dheer waxay bixin karaan dawo qorida qaybo yaryar ah wakhtigiiba si looga hortaggo khasaaraha.
- Aad ku jirtay qorshaheena in ka badan 90 maalmood, aad ku nooshahay xarun daryeel oo wakhti dheer ah, aadna u baahan tahay sahay isla markiiba.
  - Waxaan daboolnaa sahay hal 31-maalmood ah, ama wax ka yar haddii warqadda daawada lagu qoray ay tahay maalmo ka yar. Tani waxay u dheer tahay sahayda ku meel gaarka ah ee kor ku xusan.
  - **Kuwan xubanaha hadda ah ee qorshaha iyo kuwa u wareegaya heer ka duwan oo daryeelka ah:** Waxaanu dabooli doonaa saadka 31-ka maalmood ah, ama ka yar haddii dawo qoridaada la qoray dhow maalmood. Haddii aad tahay xubin hadda, la oggolaaday ama laga saaray rugta daryeelka muddada-dheer, waxaa lagu oggolaan doonaa in “dib-u-buuxinta-dhaqso-dhow” laga dhaafto si loo hubiyo inaad hesho sahay ku filan oo ah daawooyinkaaga.

## D2. Codsashada sahay ku meelgaar ah

In la waydiiyo saadka ku meel gaadhka ah ee dawada, soo wac Adeega Macmiilka.

Markaad hesho sahayda ku meel gaadhka ah ee dawada, la hadal bixiyahaaga sida ugu dhakhsaha badan si aad u go'aansato waxa aad samaynayso marka saadkaagu dhamaado. Waa kuwan doorashooyinkaagu:

- U beddelo daawo kale.

Qorshahayagu waxa laga yaabaa inuu daboolo daawo kale oo adiga kuu shaqaynaysa. Wac Adeega Macmiilka si aad u waydiiso liiska dawooyinka aanu daboolno ee daaweeya isla xaalad caafimaad. Liisku wuxuu ka caawin karaa bixiyahaaga inuu helo dawo la daboolay oo laga yaabo inay ku shaqeyso.

### AMA

- Codso ka-dhaafitaan.

Adiga iyo adeeg bixiyahaagu waxaad na waydiisan kartaan inaanu samayno ka reebis. Tusaale ahaan, waxaad na weydiisan kartaa inaan daboolno dawada aan ku jirin *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ama waxaad na weydiisan kartaa inaan dawada u daboolno xad la'aan. Haddii adeeg-bixiyaaga uu sheego inaad haysato sabab wanaagsan oo caafimaad si lagu siiyo ka-dhaafitaan, waxay kaa caawin karaan inaad mid codsato.

---

## E. Isbeddellada caymiska daawooyinkaaga



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Inta badan isbeddelada caymiska daawooyinka waxay dhacaan Janaayo 1, laakiin waxa laga yaabaa inaan daawooyin ku darno ama ka saarno *Drug List (Liiska Daawooyinka)* inta lagu gudo jiro sanadka. Waxaanu sidoo kale beddeli karnaa sharciyadayada ku saabsan daawooyinka.

Tusaale ahaan, waxaan laga yaabaa:

- Go'aanso inaad u baahan tahay ama aadan u baahnayn helitaanka oggolaansho hore (PA) ee daawada (oggolaansho anaga nalaga helo ka hor inta aadan qaadan daawada).
- Ku dar ama beddel cadadka daawada aad heli karto (xaddidaadyada tirada).
- Ku dar ama beddelo xannibaadaha daawaynta tillaabada ee daawada (waa inaad isku daydaa hal daawo ka hor inta aynaan daboolin daawo kale).

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xeerarka daroogada, tixraac **Qaybta C**

Haddii aad qaadato daawo aanu daboolnay **bilawga** sanadka, guud ahaan kama saari doono ama beddeli mayno **caymiska dawadaas inta sanadka ka haray marka laga** reebo haddii:

- daawo cusub oo ka qiimo jaban ay suuqa soo gasho taas oo u shaqeysa si la mid ah daawada ku jirta hadda *Drug List (Liiska Dawooyinka)* hadda, **ama**
- aanu ogaano in dawadu badbaado aanay lahayn, **ama**
- dawada laga saaray suuqa.

### Maxaa dhacaya haddii caymisku uu bedelo daawada aad qaadanayso?

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa dhacaya marka *Drug List (Liiska Dawooyinka)* uu isbedelo, waxaad had iyo jeer:

- Ka hubi *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ee hadda onlayn **ucare.org/dsnp-druglist** ama
- wac Adeegga Macmiilka lambarka xagga hoose ee bogga si aad u hubiso Liiska Dawooyinka ee hadda. *Drug List (Liiska Dawooyinka)*.

### Isbeddellada aan ku samayn karno *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ee adiga saamaynaya inta lagu jiro sannadka qorshaha

Isbeddela qaarkood ee *Drug List (Liiska Dawooyinka)* waxa ay dhici doonaan isla markaaba.

Tusaale ahaan:

- Daawo magaca guud ee cusub la heli karo. Wakhtiyada qaarkood, dawada magaca guud leh ama dawada bedelka u ah ee timaada suuqa oo u shaqaysa si la mid ah dawada magaca summada ama daawada asalka ah ee ku jirta *Drug List (Liiska Dawooyinka)* hadda. Marka ay taas dhacdo, waxaanu ka saari karnaa magaca dawada summada leh oo waxaan ku dari karnaa dawo cusub oo magaca kimikada leh, laakiin kharashkaaga dawada cusub waxa uu ahaan doonaa isku mid ama wuu ka jabnaan doonaa.

Marka aanu ku darno daawada bilaa magaca shirkada ah, waxaanu sido kale go'aamin



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

doonaa si uu u lahaad summada magaca dawada ku jirta liiska laakiin beddelka sharciyada daboolideeda ama xadidnaanta.

- Waxa dhici karta in aanaan kuu sheegin adiga ka hor inta aanaan samayn isbeddelkan, laakiin waxaanu kuu soo diri doonaa macluumaadka ku saabsan isbeddelka gaarka ah ee aanu samaynay marka aanu samayno.
- Adiga ama adeeg-bixiyahaaga waxaaad waydiisan kartaan “ka-dhaafitaanka” isbeddeladan. Waxaanu kuu soo diri doonaa ogaysiiska wata tallaabooyinka aad qaadi karto si loo waydiiyo ka reebida. Fadlan tixraac **Cutubaka 9** ee buug yarahan si aad u hesho wixii macluumaad dheeraada ah ee ku saabsan ka-dhaafitaanada.
- **Daawada suuqa laga saaray.** Haddii FDA ay sheegto in daawada aad qaadanayso aanay ammaan ahayn ama soo saaraha daawada uu suuqa ka saaro daawada, waxaanu ka saaraynaa *Drug List (Liiska Dawooyinka)*. Haddii aad isticmaalayso dawada, waxa aan kuusoo diri doonaa ogaysiis marka aan bedelno kadib. Markay tani dhacdo, waa inaad la hadasho dhakhtarkaaga ama dawo qoraha kale. Isaga ama ayada waxa ay kaa caawin karaan in aad go'aansato haddii dawo lamid ahi oo ku jirta *Drug List (Liiska Dawooyinka)* aad qaadan karto taas bedelkeeda.

**Waxaanu samayn karnaa isbeddelo kale oo saameeya dawooyinka aad qaadato.** Waxaan si hormaris ah kuugu sii sheegaynaa isbeddeladan kale ee lagu sameeyay *Drug List (Liiska Dawooyinka)*. Isbeddeladan waxay dhici karaan haddii:

- FDA ay bixiso hagitaan cusub ama ay soo baxaan hagitaano caafimaad oo cusub oo ku saabsan dawooyinka.

Marka isbeddeladan dhacaan, annagu, waxaan:

- Waxaan kuu sheegaynaa ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta aanaan isbeddel ku samayn *Drug List (Liiska Dawooyinka)* **ama**
- Waxaan ku ogaysiin doonaa 30-maalmood oo dawada ah kadib markaad codsato dib-u-buuxin.

Tani waxay ku siinaysaa wakhti aad la hadasho dhakhtarkaaga ama qoraha kale. Waxay kaa caawin kartaa inaad go'aan gaadho:

- Haddii dawo la mid ah ay ku jirto *Drug List (Liiska Dawooyinka)* waxaad qaadan kartaa beddelkeeda **ama**
- Haddii ay tahay inaad codsato in lagaa dhaafo isbeddeladan si aad u sii wadato daawada ama nooca dawada aad qaadanaysay. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan weydiinta ka-dhaafitaanka, tixraac **Cutubka 9** ee *Member Handbook*.

**Isbeddellada aan ku samayn karno *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ee adiga aan ku saamaynayn inta lagu jiro sannadka qorshaha**



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



Waxaa laga yaabaa inaan wax ka bedelno daawooyinka aad qaadato oo aan hadda saameyn kugu yeelan. Isbeddelada noocaas ah, haddii aad qaadnayso daawo aanu daboolnay **bilowga** sanadka, guud ahaan kama saarno ama ma beddelno caymiska daawadaas **inta lagu jiro sannadka intiisa kale**.

Tusaale ahaan, haddii aanu dawo ka saarno waxaad qaadnayso ama xadidaysaa isticmaalkeeda, markaa isbeddelku ma saamayn doono isticmaalkaaga dawada inta hadhay sanadka.

Hadii ay wax isbedeladaan mid ka mid ahi ku dhacaan dawada aad qaadnayso (marka laga reebo isbedelada lagu xusay qaybta sare), isbedelku ma saamayn doono isticmaalkaaga ilaa Janaayo 1 sanadka xiga.

Kuuma sheegi doono wax ku saabsan noocyada isbedelada si toos ah sanadkan. Waxa aad u baahan doontaa in aad eegto *Drug List (Liiska Dawooyinka)* qorshaha sanadka xiga (marka uu liisku diyaar noqdo inta lagu guda jiro isdiiwaangelinta furan) si aad u aragto hadii ay jiraan isbedelo saamayn kugu yeelan doona inta lagu guda jiro sanadka qorshaha ee xiga.

---

## F. Daboolida dawada xaaladaha gaarka ah

### F1. Isbitaal ama goob kalkaalin caafimaad oo xirfad leh oo joogitaankeedu uu qorshaheena daboolayo

Haddii lagu dhigo cusbitaal ama xarun kalkaalin caafimaad oo xirfad leh si aad u joogtid qorshahayagu, waxaanu guud ahaan daboolnaa kharashka dawooyinka lagu qoray muddada aad joogtid. Ma bixin doontid lacag-bixin. Marka aad ka baxdo cisbitaalka ama xarunta kalkaalinta ee xirfada leh, waxaanu dabooli doonaa daawayntaada ilaa iyo inta ay dawooyinku ka soo baxayaan dhammaan xeerarka caymiskayaga.

### F2. Xarunta daryeelka muddada-dheer

Caadiyan, xarunta daryeelka muddada-dheer, sida xarunta kalkaalinta, waxay leedahay farmashi u gaar ah ama farmashiye u siiya dawooyinka dhammaan dadka deggan. Haddii aad ku nooshahay xarunta daryeelka xiliga dheer, waxaad ka heli kartaa dawo qoridaada dhexda xarunta farmasiiga, haddii ay qab ka tahay xarunta farmasiiga shabakadayada.

Fiiri *Provider and Pharmacy Directory* si aad u ogaatid in farmasiigaaga xarunta daryeelka muddada-dheer uu qayb ka yahay shabakadayada. Haddii aysan ahayn ama haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, la xiriir Adeegga Macmiilka.

### F3. Gudaha barnaamijka nasinta ee Medicare ee shatiyaysan

Darogadu waligeed isku mar ma wada daboolaan daryeelka guriga iyo qorshaheena labadaba.

- Waxaa laga yaabaa in lagu diiwaan geliyo isbitaalka Medicare oo aad u baahan tahay daawooyin gaar ah (tusaale, daawada xanuunka, dawooyinka lalabo, dawooyinka



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

caloosha jilcisa, ama daawooyinka ka hortagga welwelka) taas oo isbitaalkaagu uusan daboolin sababtoo ah lama xiriiraan saadaalinta xanuunka ku haya iyo xaaladaada caafimaad. Xaaladaas darteed, qorsheheenu waa in uu fariin ka helaa daawo qorahaaga ama daawo bixiyahaaga in ay tahay mid aanan la xariirin ka hor inta aanan daboolin.

- Si looga hortago dib u dhac ku yimaada helitaanka dawooyinka aan la xiriirin ee qorshaheena ay tahay inuu daboolo, waxaad waydiisan kartaa bixiyahaaga nasinta ama daaweeyahaaga si aad u hubiso inaanu hayno ogaysiinta in daawadu aanay xiriir la lahayn ka hor inta aanad waydiisan farmashiyaha inuu buuxiyo daawada.

Haddii aad ka baxdo hospice-ka, qorshahayagu wuxuu daboolayaa dhammaan daawooyinkaaga. Si looga hortago dib u dhac kasta oo ka dhaca farmashiyaha marka ay dhamaato dheefaha hospice-ka ee Medicare, u qaado dukumeenti farmashiyaha si aad u xaqiijiso inaad ka tagtay hospice-ka.

Tixraac qaybaha hore ee cutubkan oo ka warramaya daawooyinka qorshaheenu daboolayo. Tixraac **Cutubka 4** ee *Member Handbook* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gunnada nasinta.

---

## **G. Barnaamijyada ku saabsan badbaadada dawada iyo maaraynta dawada**

### **G1. Barnaamijyo kaa caawinaya inaad si badbaado leh u isticmaasho daawooyinka**

Wakhti kasta oo aad buuxso dawo qorida, waxanu raadinaa dhibaatooyinka suuragalka ah, sida khaladaadka dawada ama dawooyinka:

- ayaa laga yaabaa inaan loo baahnayn sababtoo ah waxaad qaadataa daawo kale oo la mid ah
- aan badbaado u noqon karin da'daada ama jinsigaaga
- waxyeelo kuu gaysan kara haddii aad isticmaasho isku mar
- ay ku jiraan maadooyin laga yaabo ama aan laga yaabin inaad xasaasiyad ku leedahay
- ku jira xadi opioid ah oo loogu talagalay xanuun baabi'in

Haddii aan ku aragno dhibaato suurtagal ah isticmaalkaaga dawooyinka dhakhtarku qoray, waxaanu kala shaqaynaa bixiyahaaga si aan u saxno dhibaataada.

### **G2. Barnaamijyo kaa caawinaya inaad maareyso daawooyinkaaga**

Qorshahayagu waxa uu leeyahay barnaamij lagu caawinayo xubnaha leh baahiyaha caafimaad ee adag. Xaaladahan oo kale, waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad hesho adeegyo, lacag la'aan,



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

iyada oo loo marayo barnaamijka maaraynta daawaynta teerabiyada (MTM). Barnaamijkani waa ikhtiyaari waana bilaash. Barnaamijkani waxa uu idinka caawinayaa adiga iyo adeeg bixiyahaaga in aad hubisaan in daawayntaadu ay ka shaqaynayso hagaajinta caafimaadkaaga. Haddii aad u qalanto barnaamijka, farmashiistaha ama xirfadle kale oo caafimaad ayaa ku siin doona dib u eegis dhamaystiran dhammaan daawooyinkaaga oo kaala hadli doona:

- sida loo helo gunnada ugu wanaagsan ee dawooyinka aad qaadato
- walaacyo kasta oo aad qabto, sida kharashyada dawada iyo falcelinta dawada
- sida ugu wanaagsan ee loo qaato daawadaada
- su'aalo kasta ama dhibaatooyinka aad qabto ee ku saabsan dawo qoridaada iyo dawooyinka farmashiga laga soo iibsano

Kadib, waxay ku siin doonaan:

- Qoraal kooban oo dooddan ah. Soo koobiddu waxa ay leedahay qorshe hawleed daawad kaas oo ku talinaya waxa aad ka qaban karto sida ugu wanaagsan ee isticmaalka daawooyinkaaga.
- Liiska dawooyinka gaarka ah oo ay ku jiraan dhammaan daawooyinka aad qaadato, inta aad qaadato, iyo goorta iyo sababta aad u qaadato.
- Macluumaad ku saabsan in si badbaado leh loo tuuro daawooyinka dhakhtarku qoray ee ah walxaha la xakameeyey.

Waa fikrad wanaagsan inaad kala hadasho dhakhtarkaaga qorshahaaga waxqabad iyo liiska daawada.

- Qorshe-hawleedkaaga iyo liiska daawada hore u qaado xilliga booqashadaada ama wakhti kasta oo aad la hadlayso dhakhaatiirta, farmashiistayaasha, iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka.
- Qaado liiskaaga daawada haddii aad aado isbitaalka ama qolka gargaarka degdega ah.

Barnaamijyada MTM waa tabaruc waana bilaash xubnaha u qalma. Haddii aanu hayno barnaamij ku habboon baahiyahaaga, waxaanu ku diwaangelinaynaa barnaamijka oo aanu kuu soo dirnay macluumaad. Haddii aadan rabin inaad ka mid noqoto barnaamijka, nala soo socodsii, annaguna waan kaa saari doonaa.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan barnaamijyadan, la xidhiidh Adeegga Macmiilka ama isku-duwaha daryeelkaaga.

### **G3. Barnaamijka maareynta mukhaadaraadka ee isticmaalka badbaadada leh ee daawooyinka opioid-ka**

Qorshahayagu waxa uu leeyahay barnaamij ka caawin kara xubnaha inay si badbaado leh u



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

isticmaalaan dawooyinka opioid ee loo soo qoray iyo daawooyinka kale ee sida badan loo isticmaalo. Barnaamijka waxaa loogu yeedhaa Barnaamijka Maaraynta Dawada (DMP).

Haddii aad isticmaasho dawooyinka obiyodhka ee aad ka hesho dhowr dhakhaatiir ama farmashiyo ama haddii aad dhawaan qaadatay dawo badan oo obiyodh ah, waxaa laga yaabaa inaan la hadalno dhakhtarkaaga si aanu u xaqiijino in isticmaalkaaga dawada obiyodhka uu yahay mid habboon oo dawa ahaan lama huraan ah. La shaqeynta dhakhaatiirtaada, haddii aan go'aansanno isticmaalkaaga daawada xashiishka ama daawooyinka dhimirka aysan badqab kuu lahayn, waxaa laga yaabaa inaan xaddidno sida aad u heli karto daawooyinkaas. Xadidnaanta waxaa ka mid ah:

- In lagaaga baahdo inaad dhammaan rijeetada daawooyinka ka hesho farmashiye gaar ah iyo/ama dhakhtar gaar ah
- Xaddidda inta ay le'eg yihiin daawooyinka aan kuu daboolno

Haddii aan u maleyno in mid ama in ka badan ay ku khuseyso, waxaan horay kuugu soo diri warqad. Warqaddu waxay kuu sheegi doontaa haddii aan kuu xaddidno caynsanaanta daawooyinkan, ama haddii laga rabo inaad ka hesho dawooyinka daawooyinkan kaliya bixiye gaar ah ama farmashiye.

**Waxaad haysan doontaa fursada aad noogu sheegto kuwa ay yihiin dhakhtarada ama farmashiyada aad doorbidayso inaad isticmaasho iyo macluumaad kasta oo muhiim noo ah inaanu ogaano.** Haddii aan go'aansanno inaan xaddidno caymiskaaga daawooyinkan ka dib markaad fursad u hesho inaad ka jawaabto, waxaan kuu soo direynaa warqad kale oo xaqiijinaysa xaddidaadda.

Haddii aadu malaynayso inaanu khalad samaynay, waxaad diiday inaad khatar ugu jirto si khaldan u isticmaalka dawo qorida, ama waad khilaaftay xadidka, adiga iyo dawo qorahaaga waxaad soo xarayn kartaa rafcaan. Haddii aad rafcaan qaadato, waxaanu dib u eegi doonaa kiiskaaga oo aanu ku siin doonaa go'aankayaga. Haddii aan sii wadno in aan diidno qayb ka mid ah rafcaankaaga ee la xidhiidha xaddidaadda gelitaankaaga dawooyinkan, waxaanu si toos ah kiiskaaga ugu diraynaa Ururka Dib-u-eegista Madax-bannaan (IRO). (Si aad wax badan uga barato rafcaannada iyo IRO, tixraac **Cutubka 9** ee *Member Handbook*.)

DMP kuguma habboonaan doonto haddii aad:

- qabto xaalado caafimaad oo kale, sida kansarka ama cudurka unugyada dhiiga cas ee la dhaxlo.
- aad helayso daryeel caafimaad guri, xanuun baabi'iyee, ama daryeelka dhamaadka nolosha, **ama**
- ku nooshahay xarunta daryeelka muddada-dheer.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## Cutubka 6: Waxa aad ku bixiso daawooyinkaaga Medicare iyo Medical Assistance

### Hordhaca

Cutubkan waxa uu sheegayaa waxa aad ku bixiso dawo qoridaada bukaan socodka. Ee “dawooyinka,” waxaanu ujeednaa:

- Daawooyinka Medicare Part D, **iyo**
- Daawooyinka iyo alaabta lagu daboolay Medical Assistance, **iyo**
- Daawooyinka iyo walxaha uu qorshaheena u daboolay gunnooyinka dheeraadka ah ahaan.

Sababtoo ah waxaad xaq u leedahay Kaalmada Caafimaadka, waxaad ka helaysaa “Caawimo Dheeraad ah” Medicare si ay kaaga caawiso bixinta daawooyinkaaga Medicare Qaybta D.

**Caawimada dheeraadka ah** aa barnaamijka Medicare ee caawiya dadka leh dakhliga xadidan iyo ilaha yareeya Medicara Qaybta D kharashyada dawo qorida sida lacagta caymiska, jarjarida, iyo kharashka la wada bixiyo. Caawimada Dheeraadka ah sidoo kale waxaa loogu yeedhaa “Kaabida Dakhliga hoose,” ama “LIS.”

Erayada kale ee muhiimka ah iyo qeexitaankoodu waxay u soo baxayaan siday u kala horreeyeen alifbeetada cutubka u dambeeya *Member Handbook*.

Si aa u barato wax badan oo ku saabsan dawo qorida, waxaad eegi kartaa meelahan:

- Liiskeena *Dawooyinka La Daboolay*.
  - Tan waxaan ugu yeernaa *Drug List (Liiska Dawooyinka)*. Waxay kuu sheegtaa:
    - Daawooyinka aan bixino
    - Haddii ay jiraan wax xad ah oo daroogada ah
    - Haddii aad u baahan tahay koobiga *Drug List (Liiska Dawooyinka)*, wac Adeegga Macmiilka. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa nuqulka ugu dambeeya ee *Drug List (Liiska Dawooyinka)* websaydkeena [ucare.org/dsnp-druglist](http://ucare.org/dsnp-druglist).
- **Cutubka 5** ee *Member Handbook*.
  - Wuxuu kuu sheegayaa sida aad qorshaheena caymiska uga heli karto dawooyinkaaga bukaan-socod.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Waxaa ka mid ah, sharciyada aad u baahan tahay inaad raacdo. Waxa kale oo ay sheegtaa noocyada dawooyinka dhakhtarku qoray ee aanu qorshahayagu daboolin.
- Marka aad isticmaasho qorshaha “Real Time Benefit Tool” si aad u fiiriso caymiska dawada (tixraac **Cutubka 5**, Qaybta B2), kaharshka lagu muujiyey “real time” macneheedu waa qiimaha la soo bandhigay aalada in ay dib u saamaynayso xiliga waqtiga si loo bixiyo qiyaasta qiimayaasha laga bixiyo jeebka ee aad filan karto in aad bixiso. Waxaad wici kartaa care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga) ama adeegga macaamiisha wixii macluumaad dheeraad ah.
- Tusaheena Provider and Pharmacy Directory.
  - Badanka xaaladahda, waa inaad isticmaashaa shabakada farmasiiyada si aad u hesho dawadaada la daboolay. Farmashiyeyaasha shabakadu waa farmasiyo oggolaaday inay nala shaqeeyaan.
  - Tusaha *Provider and Pharmacy Directory* wuxuu liis gareeyaa farmashiyeyaasha shabakada ku jira. Tixraac **Cutubka 5** ee *Member Handbook* wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan farmasiyada shabakada.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## Jadwalka Tasmada

<b>A. Sharaxaada <i>Gunnooyinka</i> (EOB).....</b>	<b>176</b>
<b>B. Sida loola socdo kharashyada daawadaada .....</b>	<b>177</b>
<b>C. Wax kharash ah kama bixinaysid sahayda halka-bil ah ama dawooyinka waqtiga dheer .....</b>	<b>178</b>
C1. Heerarka qaybsiga kharashka.....	178
C2. Doorashada farmashiyahaaga.....	179
C3. Helitaanka sahayda daawada muddada-dheer.....	179
<b>D. Tallaalada.....</b>	<b>179</b>
D1. Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato ka hor inta helin tallaalka.....	180



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## A. Sharaxaada *Gunnooyinka* (EOB)

Qorshahaynu wuxuu ilaalinayaa dawooyinka lagu qoray. Waxaan la soconaa laba nooc oo kharash ah:

- **kharashka ka baxa jeebkaaga.** Tani waa tirada lacagta adiga ama dadka kale ee magacaaga ku hadlaya aad ku bixisaan daawooyinkaaga. Waxaa ka mid ah kharashaadka aad bixiso marka aad hesho dawada Qaybta D ee caymisku daboolay, kharash bixin kasta oo daawo ah oo ay sameeyaan qoyskaaga ama asaxaabtaada, kharash bixin kasta oo daawo ah oo ay bixiso “Extra Help” kana socda Medicare, loo-shaqeeye ama qorshayaasha caafimaadka midaysan, TRICARE, Indian Health Service, barnaamijyada caawinta dawada AIDS, deeqaha, iyo inta badan Barnaamijyada Kaalmada Daawada ee Gobolka (SPAPs).
- **Kharashyada guud ee daawada.** Tani waa wadarta dhammaan lacagihii lagu bixiyay dawadaada Part D ee la daboolay. Waxaa ka mid ah kharashaadka qorshuhu bixiyay, iyo kharashaadka barnaamijyada kale ama ururadu ku bixiyeen daawooyinkaaga Part D ee caymisku daboolay.

Marka aad ka hesho dawooyinka lagu soo qoray qorshahayaga, waxaanu kuu soo diri doonaa kooban oo loo yaqaan *Sharaxaada Gunnooyinka*. Waxa aanu ugu yeernaa EOB si kooban. EOB maaha biil. EOB-ga wuxuu haayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daawooyinka aad qaadato. EOB ga waxaa ku jiraa.

- **Macluumaadka loogu talagalay bisha.** Soo koobiddu waxay sheegaysaa daawooyinka lagu qoray ee aad heshay bishii hore. Waxay tusinaysaa wadarta kharashka dawada, waxa aanu bixinay, iyo waxa adiga iyo dadka kale ee adiga ku bixinayaba aad bixisay.
- **Macluumaadka sannad-ila-taariikheed.** Tani waa wadarta kharashkaaga daawada iyo wadarta lacag bixinta aad bixisay ilaa Janaayo 1.
- **Macluumaadka qiimaha daawada.** Tani waa wadarta qiimaha dawada iyo isbeddel kasta oo boqolkiiba ah ee ku yimaadda qiimaha daawada tan iyo buuxintii ugu horreysay.
- **Beddelka qiima hooseeya leh.** Marka la heli karo, waxay kasoo baxayaan soo koobida daawooyinkaaga hadda. Waxaad la hadli kartaa dhakhtarkaaga si aad wax badan u ogaato.

Waxaan bixinaa caymiska dawooyinka aan hoos iman Medicare.

- Lacagaha lagu bixiyo dawooyinkaan kuma xisaabsana wadarta kharashyada ka baxa jeebkaaga.
- Si aad u ogaato daawooyinka uu qorshahayagu daboolayo, tixraac *Drug List (Liiska Dawooyinka)*. Marka lagu daro dawooyinka hoos yimaada Medicare, qaar ka mid ah dawooyinka dhakhtarku qoro iyo kuwa aan farmashiyaha laga iibsanaa ayaa lagu daboolay



**Haddii aad qabto su'aalo,** fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



Kaalmada Caafimaadka. Daawooyinkaan waxay ku jiraan *Drug List (Liiska Dawooyinka)*.

## B. Sida loola socdo kharashyada daawadaada

Si aad ula socoto kharashaadkaaga dawada iyo lacagaha aad bixiso, waxaanu isticmaalnaa diiwaanada aanu ka helno adiga iyo farmashiyahaaga. Halkaan waxaa ah sida aad nagu caawin karto:

### 1. Isticmaal Kaarka Aqoonsiga Xubinta.

Tus kaarka aqoonsiga xubinta mar kasta oo lagu soo qoro warqad dhakhtar. Tani waxay naga caawinaysaa inaan ogaano warqadaha daawada ee aad buuxiso iyo waxa aad bixiso.

### 2. Hubi inaan hayno macluumaadka aan u baahanahay.

Na sii koobiyada rasiidhada dawooyinka la daboolay ee aad bixisay. Waxaad na weydiisan kartaa inaan lacag kugu soo celino.

Halkan waxaa ah waqtiyada qaarkood marka ay tahay inaad na siiso nuqullada rasiidhadaada:

- Marka aad dawo caymisku daboolay ka iibsato farmashiyaha shabkada ku jira weliba qiimo gaar ah ama adigoo isticmaalaya kaarka qiimo dhimista ee aan qayb ka ahayn gunnooyinka qorshaheena
- Markaad bixiso kharash-wadaaga dawooyinka ee aad ka hesho barnaamijka kaalmada bukaanka ee daawooyinka
- Marka aad dawooyinka caymisku daboolo ka soo iibsato farmashiye ka baxsan shabakada
- Markaad bixiso qiimaha buuxa ee daawada caymisku daboolay

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan inaad naga codsato inaan dib kuugu celino qaybteena kharashka daawada, tixraac **Cutubka 7** ee *Member Handbook*.

### 3. Noo soo dir macluumaadka ku saabsan lacagaha ay dadka kale kuu sameeyeen.

Lacagaha ay bixiyaan dad iyo ururo kale ayaa sidoo kale lagu tiriyaa adiga kharashyada jeebka ka baxsan. Tusaale ahaan, lacagaha ay bixiso barnaamijka gargaarka daroogada ee AIDS-ka (ADAP), Adeegga Caafimaadka Hindiya, iyo inta badan hay'adaha samafalku waxay ku xisaabtamaan kharashyadaada jeebka ka baxsan.

### 4. Fiiri EOB-yada aan kuu soo dirno.

Markaad EOB ku hesho boostada, hubi inay dhamaystiran tahay oo sax tahay.

- **Ma aqoonsantahay magaca farmashi kasta?** Hubi taariikhaha. Maalintaas miyaad heshay daawooyinka?
- **Ma heshay daawooyinka liiska ku jira?** Miyay waafaqsam ujoom kuwa ku qoran



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

rasiitkaaga? Daawooyinka miyay waafaqsan yihiin waxa dhakhtarkaagu kuu soo qoray?

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad wici kartaa Adeegga Macaamiisha ee UCare Connect + Medicare ama waxaad akhrin kartaa *Member Handbook* ee UCare Connect + Medicare. Waxaad sidoo kale tixraaci kartaa *Member Handbook* oo ku jira websaydkeena **ucare.org/formembers**.

### **Ka warran haddii aad khaladaad ka hesho qoraalkan kooban?**

Haddii ay wax jahawareersan yihiin ama aysan sax ugu muuqan EOB, fadlan wac UCare Connect + Medicare Adeegga Macmiilka ee. Waxaad sidoo kale jawaabaha ku aadan su'aalo badan ka heli kartaa websaydkeena: **ucare.org**.

### **Ka warran khiyaamo suurtagal ah?**

Haddii qoraalkan koobani muujinayo daroogooyinka aanad qaadanayn ama wax kale oo kuu muuqda inaad ka shakisan tahay, fadlan nala soo xidhiidh.

- Khadka Tooska ah ee U Hogaansanaanta/khiyaanada UCare ka wac 1-877-826-6847 (wacitaankan waa bilaash), 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii; Isticmaalayaasha TTY waxay wici karaan 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash); 8 am – 8 pm, 7 maalmood usbuucii; ama waxaad iimayl u diri kartaa [compliance@ucare.org](mailto:compliance@ucare.org). Waxaad ilaashan kartaa qarsoodinimadaada.
- Ama, Medicare ka wac 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227). Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 1-877-486-2048. Waxaad wici kartaa lambaradan si bilaash ah, 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii.

Haddii aad u malaynayso inay wax khaldan yihiin ama maqan yihiin, ama haddii aad wax su'aalo ah qabtid, wac Adeegga Macaamiisha. Waxaad sidoo kale dib u eegi kartaa Part D EOB adiga oo gelaya akoonkaaga khadka tooska ah ee Xubinnimada UCare ee **member.ucare.org** isla markaana eegaya Part D EOB billaha ah ee maktabadda Dukumentiyada. Ilaasho EOB-yadan. Waa diiwaano muhiim ah oo ku saabsan kharashaadkaaga dawada.

---

## **C. Wax kharash ah kama bixinaysid sahayda halka-bil ah ama dawooyinka waqtiga dheer**

Qorshahayaga, wax kharash ah kama bixinaysid dawooyinka la daboolay haddiiba aad raacayso xeerarkeena.

### **C1. Heerarka qaybsiga kharashka**

- Dawooyinka heerka 1 waxay leeyihiin kharasha wadaag \$0 ah.
- Dawooyinka magaca summada ee heerka 1 waxay leeyihiin kharasha wadaag \$0 ah.
- OTC-yadu waxay leeyihiin kharasha wadaag \$0 ah.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## C2. Doorashada farmashiyahaaga

Inta aad dawada ku bixinayso waxay ku xidhan tahay inaad dawada ka heshay:

- farmashi shabakada ku jira, **ama**
- farmashiye ka baxsan shabakada Xaalado xaddidan, waxaanu daboolnaa daawoyinka lagu qoray farmasiyada ka baxsan shabakada. Tixraac **Cutubka 5** ee *Member Handbook* si aad u ogaato goorta aan sidaas samayn doono.
- Farmashiyaha boostada lagu dalbado

Tixraac **Cutubka 9** ee *Member Handbook* si aad u ogaato sida loo xareeyo rafcaanka haddii lagu sheego in dawada aan la dabooli doonin. Si aad wax badan uga barato doorashooyinkan farmashiyaha, eeg **Cutubka 5** ee *Member Handbook* iyo *Tusaha Provider and Pharmacy Directory*.

## C3. Helitaanka sahayda daawada muddada-dheer

Daawooyinka qaarkood, waxaad heli kartaa sahay waqti dheer ah (sidoo kale loo yaqaan sahayda la dheereeyey') markaad buuxiso riijeetada. Sahayda muddada-dheer waa ilaa sahay 100 maalmood ah. Ma jiro wax kharash ah oo kaaga baxaya saadka wakhtiga dheer.

Faahfaahinta ku saabsan halka iyo sida loo helo dawooyinka muddada-dheer, tixraac **Cutubka 5** Qaybta A7 ee *Member Handbook* ama tusaha *Provider and Pharmacy Directory*.

---

## D. Tallaalada

**Fariin Muhiim ah oo Ku saabsan Waxa aad Ka Bixinayso Talaalada:** Talaalada qaarkood waxaa loo tixgeliyaa gunnooyin caafimaad waxaana lagu daboolaa Medicare Part B. Talaalada kale waxaa loo tixgeliyaa dawooyinka Medicare Part D. Waxaad tallaalan ka heli kartaa liiska ku jira *Liiska Dawooyinka la daboolay ee qorshaha (Formulary)*. Qorshaheena waxa uu daboolaa inta badan tallaalada Medicare Part D ee dadka qaangaarka ah iyada oo aan wax kharash ah kaaga bixin. Tixraac *Liiska Dawooyinka La Dabooshay ee qorshahaaga (Formulary)* ama la xirii Adeegga Macaamiisha si aad u hesho faafaahinta caymiska iyo wadaagista kharashka ee ku saabsan tallaalada gaarka ah.

Waxaa jira laba qaybood oo daboolaya tallaallada Qaybta D ee Medicare:

1. Qaybta hore ee caymiska waxa loogu talagalay kharashka **tallaalku laftiisa**. Tallaalku waa daawo dhakhtar qoray.
2. Qaybta labaad ee caymiska waxa loogu talagalay kharashka **ku siinaya tallaalka**. Tusaale



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

ahaan, mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad u qaadata tallaalka uu dhakhtarkaagu ku siiyo.

## **D1. Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato ka hor inta helin tallaalka**

Waxaan kugula talineynaa inaad wacdo Adeegga Macmiilka haddii aad qorsheyneyso inaad hesho tallaalka.

- Waxaan kuu sheegi karnaa sida qorshahayagu u daboolo tallaalkaaga waxaan kuu sharixi karnaa qaybta kaaga soo aadaysa kharashka



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii.  
**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## **Cutubka 7: Naga codsashada inaan bixinno qaybtayada biilka adeegyada la daboolay ama daawooyinka**

---

### **Hordhaca**

Cutubkani waxa uu kuu sheegayaa sida iyo goorta aad noo soo diri lahayd biilka si aad u weydiiso lacag bixinta. Waxa kale oo ay kuu sheegaysaa sidarafcaan loo qaato haddii aadan ku raacsanayn go'aanka caymiska. Erayada muhiimka ah iyo qeexitaankoodu waxay u soo baxayaan siday u kala horreeyaan alifbeetada cutubka ugu dambeeya *Member Handbook*.

### **Jadwalka Tasmada**

<b>A. Naga codsashada inaan bixino kharashaadka adeegyadaada ama daawooyinkaaga.....</b>	<b>182</b>
<b>B. Noo soo diraya codsi lacag bixin ah .....</b>	<b>185</b>
<b>C. Go'aannada ceymiska .....</b>	<b>186</b>
<b>D. Racfaanada.....</b>	<b>186</b>



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## A. Naga codsashada inaan bixino kharashaadka adeegyadaada ama daawooyinkaaga

Waa inaad helin biil lagu dalacay adeegyada shabakada ku jira ama daawooyinka lagu daboolay Medical Assistance. Bixiyayaasha shabakadayadu waa inay dallacaan qorshaha adeegyadaada iyo daawooyinkaaga la daboolay ka dib markaad hesho. Bixiye shabakad waa bixiye la shaqeeya qorshaha caafimaadka.

Ma ogolin bixiyayaasha UCare Connect + Medicare inay kugu soo dalacaan adeegyadan ama daawooyinkan. Waxa aanu u siinaa lacagta si toos ah bixiyayaasha, oo waxa aanu kaa ilaalin doonaa wixii kharash ah.

**Haddii aad hesho biilka daryeelka caafimaadka ama daawooyinka, ha bixin biilka oo noo soo dir biilka.** Si aad noogu soo dirto biil, tixraac qaybta B ee cutubkan.

- Haddii adeegyada ama daawooyinka ay yihiin kuwo aan daboolno, waxaan si toos ah kharashka u siin doonaa adeeg-bixiyaha.
- Haddii adeegyada ama daawooyinka ay yihiin kuwo aan daboolno oo aad hore u bixisay kharash ka badan qaybtaada kharashka, waxa aad xaq u leedahay in lagu soo celiyo.
  - Haddii aad bixisay adeegyada uu daboolay Medicare, waanu kuu soo celin doonaa.
  - Haddii aad bixisay kharashka adeegyada lagu daboolay Medical Assistance, kuuma soo celin karno kharashka, laakiin adeeg-bixiyaha ayaa bixin doona. Adeegga macaamiisha ama care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga) ayaa kaa caawin kara inaad la xiriirto xafiiska adeeg-bixiyaha. Tixraac xagga hoose ee bogga si aad u hesho lambarka taleefanka Adeegga Macaamiisha.
- Haddii aanaan daboolin adeegyada ama daawooyinka, waan kuu sheegi doonaa.

La xidhiidh Adeegga Macmiilka ama isku-duwaha daryeelkaaga haddii aad wax su'aalo ah qabtid. Haddii aad hesho biil oo aadan garanayn waxaad ka samayn lahayd, waan ku caawin karnaa. Waxaad sidoo kale wici kartaa haddii aad rabto inaad noo sheegto macluumaadka ku saabsan codsi lacag-bixineed oo aad horay noogu soo dirtay.

Waa kuwan tusaalooyin waqtiyo ah marka laga yaabo inaad u baahato inaad na weydiisato inaan dib kuu siinno ama aad bixiso biil aad heshay:

**FIIRO GAAR AH:** Haddii daawada ay ku jirto caymiska Medical Assistance (Medicaid), ma oggolin in adeeg-bixiyayaasha UCare Connect + Medicare in ay kugu soo dallacaan kharashaadka dawooyinkan. Waxa aanu u siinaa lacagta si toos ah bixiyayaasha, oo waxa aanu kaa ilaalin doonaa wixii kharash ah. Tani waa run haddii aanu bixino adeeg bixiyaha wax ka yar kharashyada adeeg bixiyaha. Haddii aad lacag ku bixisay adeeg ama shay aad u malaynayso in aanu daboolnay, Adeegga Macaamiisha kala xiriir lambarka ku yaala xagga hoose ee boggan.



**Haddii aad qabto su'aalo,** fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

## 1. Markaad hesho daryeel caafimaad oo degdeg ah ama degdeg ah oo aad uga hesho bixiye ka baxsan shabakada

Weydiiso bixiyaha inuu noo soo dallaco.

- Haddii aad bixiso lacagta dhamaystiran marka aad hesho daryeelka, na weydiiso inaan dib kuu soo celinno kharashka. Noo soo dir biilka iyo caddaynta lacag kasta oo aad bixisay.
- Waxaa laga yaabaa inaad adeeg-bixiye ka hesho biil ku weydiinaya lacag bixin aad u malaynayso inaan lagugu lahayn. Noo soo dir biilka iyo caddaynta lacag kasta oo aad bixisay.
  - Haddii bixiyaha lacag la siiyo, waxaan si toos ah u siin doonaa bixiyaha.
  - Haddii aad durba bixisay kharashaadka adeegyada uu daboolay Medicare, waanu kuu soo celin doonaa kharashka.

## 2. Marka bixiyaha shabakadu biil kuu soo diro

Bixiyeyaasha shabakadu waa inay had iyo jeer nagu soo dallacaan. Waa muhiim in la tusiyo kaadhka aqoonsiga xubinta marka aad hesho wax adeeg ama warqad dhakhtar ah. Laakiin mararka qaarkood way qaldamaan, oo waxay ku weydiiyaan inaad bixiso kharashaadka adeegyadaada ama in ka badan qaybta kaaga soo aadaysa kharashyada. **Wac Adeegga Macaamiisha ama care coordinator (iskuduwaha daryeelkaaga)** adigoo iticmaalaya lambarka ku yaala boggan hoose **haddii aad hesho wax biil ah.**

- Maadaama aan bixino dhammaan kharashka adeegaaga, mas'uul kama tihid inaad wax kharash ah bixiso. Bixiyeyaasha waa inaysan lacag kugu dalacin adeegyadan.
- Mar kasta oo aad biil ka hesho adeeg-bixiye ku jira shabakada, noo soo dir biilka. Waxaan si toos ah ula xiriiri doonaa bixiyaha waxaan xalin doonaa dhibaataada.
- Haddii aad durba bixisay biil kaaga yimid adeeg-bixiye shabakada ku jira oo loogu talagalay adeegyada uu daboolo Medicare, noo soo dir biilka iyo caddaynta lacag kasta oo aad bixisay. Waxaan dib kuugu soo celin doonaa kharashaadka adeegyada caymiska uu daboolay.

## 3. Haddii aad si firfircoon uga diiwaangashan tahay qorshahayaga

Mararka qaarkood diiwaangelintaada qorshaha waxay noqon kartaa dib u dhac. (Tani waxay ka dhigan tahay in maalintii ugu horreysay ee isdiiwaangelintaadu ay dhaaftay. Waxaa laga yaabaa inay xitaa ahayd sannadkii hore.)

- Haddii dib lagu diiwaan geliyey oo aad bixisay biil ka dib taariikhda isdiiwaangelinta, waxaad na waydiisan kartaa inaan dib kuu soo celino kharashka.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Noo soo dir biilka iyo caddaynta lacag kasta oo aad bixisay.

#### 4. Markaad isticmaasho farmashiyaha ka baxsan shabakada si aad u hesho warqad dhakhtar kuu qoray

Haddii aad isticmaasho farmashiyaha ka baxsan shabakada, waxaad bixinaysaa kharashka buuxa ee daawada lagu qoray.

- Xaalado tiro yar oo keliya, waxaanu dabooli doonaa dawooyinka laga buuxiyey farmashiye ka baxsan shabakada. Noo soo dir nuqul ka mid ah rasiidhkaaga marka aad naga codsato inaan dib kuu soo celino.
- Tixraac **Cutubka 5** ee *Member Handbook* si aad wax badan uga ogaato farmashiyeyaasha ka baxsan shabakada.
- Waxaa laga yaabaa inaan dib kuu siinin faraqa u dhexeeya waxa aad ku bixisay dawada ee farmashiyaha ka baxsan shabakada iyo cadadka aan ka bixin lahayn farmashiyaha shabakada ku jira.

#### 5. Markaad bixiso kharashka buuxa ee daawooyinka sabab la xiriirta inaad haysan Kaarka Aqoonsiga Xubinnimada

Haddi aanad haysan Kaarka Aqoonsiga Xubinnimada, waxa aad farmashiyaha ka codsan kartaa in uu nala soo xiriiro ama uu eego macluumaadkaaga diiwaangelinta qorshahaaga.

- Haddii farmashiistaha aanu isla markiiba heli karin macluumaadka, waxaa laga yaabaa inaad adigu iska bixiso kharashka daawada oo dhan ama aad ku soo noqoto farmashiyaha adiga oo wata Kaarka Aqoonsiga Xubinnimada.
- Noo soo dir nuqul ka mid ah risiitka marka aad naga codsanayso inaan dib kuugu soo celino kharashka.
- Waxaa laga yaabaa inaan dib kuugu soo celinin kharashka oo dhan ee aad bixisay haddii qiimaha lacagta caddaanka ah ee aad bixisay uu ka sarreeyo qiimaha laga gorgortamay ee daawada.

#### 6. Markaad bixiso kharashka buuxa ee daawo aan caymisku daboolin

Waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashka daawada oo dhan sababtoo ah daawadu ma daboolna.

- Daawadu waxa laga yaabaa in aanay ku jirin *Liiska Dawooyinka Caymisku daboolay (Drug List)* ee ku yaala websaydkeena, ama waxa laga yaabaa in ay leedahay shuruud ama xaddidaad aanad garanayn ama aanad u malayn in ay adiga ku khusayso. Haddii aad go'aansato inaad hesho daawada, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso kharashka oo dhan.
  - Haddii aadan bixin kharashka dawada laakiin aad u malaynayso inaan daboolno, waxaad codsan kartaa go'aanka caymiska (tixraac **Cutubka 9** ee *Member Handbook*).
  - Haddii adiga iyo dhakhtarkaaga ama dhakhtar kale u malaysaan inaad u baahan tahay daawada isla markiiba (24 saacadood gudahood), waxaad codsan kartaa go'aan



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



caymis degdeg ah (tixraac **Cutubka 9** ee *Member Handbook*).

**?** **Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

Adiga ama dhakhtarkaaga sidoo kale waad nala soo xidhiidhi kartaan oo wayddiisan kartaa go'aanka caymiska. Adiga ama dhakhtarkaagu waxa laga yaabaa inaad hubin in aanu bixinayno adeeg caafimaad oo gaar ah ama haddii aanu diidi karno inaanu bixino daryeel caafimaad oo aad u malaynayso inaad u baahan tahay. **Haddii aad rabto inaad ogaato haddii aanu dabooli doono adeeg caafimaad ka hor inta aanad helin, waxaad na waydiin kartaa inaanu kuu samayno go'aan caymis.**

Waxaan gaarnaa go'aan caymis mar kasta oo aan go'aan ka gaarno waxa lagu daboolayo iyo inta aan bixinno. Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa in aanu go'aansanno in adeeg ama daawadu aanay daboolin ama aanay kuu daboolin Medicare ama Assistance Medical. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka caymiska, waxaad samayn kartaa racfaan.

## D2. Racfaanada

Haddii aan gaadhno go'aanka caymiska oo aadan ku qanacsanayn go'aankan, waxaad “rafcaan ka qaadan kartaa” go'aanka. Racfaan waa hab rasmi ah oo lagu waydiisto inaanu dib u eegis ku samayno oo aanu bedelno go'aanka caymis ee aanu samaynay.

Marka ugu horraysa ee aad rafcaan ka qaadato go'aanka, tan waxa loo yaqaan Racfaanka Heerka 1aad. Racfaankan, waxaanu dib u eegis ku samaynay go'aanka caynsanaanta ee aanu gaadhnay si aanu u hubino haddii aanu si sax ah u raacnay dhammaan xeerarka. Dib u eegiyaal ka duwan kuwii sameeyay go'aanka asalka ah ayaa qabanaya racfaankaaga.

Marka aan dhamaystirno dib u eegista, waxaanu ku siinaynaa go'aankayaga. Xaalado gaar ah markay jiraan, oo lagu sharaxay cutubkan **Qaybta E2**, waxaad codsan kartaa go'aan la dedejiyay ama “go'aanka caymiska degdegga ah” ama “rafcaan degdeg ah” ee go'aanka caymiska.

Haddii aan ku nidhaahno **Maya** qayb ama dhammaan waxa aad codsatay, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad. Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska adeega caafimaadka Medicare ama shay ama daawada Part B, warqaddu waxay kuu sheegi doontaa inaan kiiskaaga u dirnay Ururka Dib-u-eegista Madaxbanaan (IRO) ee Racfaanka Heerka 2aad. Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska Part D ee Medicare ama shayga Medical Assistance, warqaddu waxay kuu sheegi doontaa sida loo xareeyo Racfaanka Heerka 2aad. Ka eeg **Qaybta E4** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Racfaanka Heerka 2aad. Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska adeega ama shay ay daboolayaan labada Medicare iyo Medical Assistance, warqaddu waxay ku siin doontaa macluumaad ku saabsan labada nooc ee Racfaannada Heerka 2aad.

Haddii aadan ku qanacsanayn heerka 2aad ee racfaanka go'aanka, waxaa laga yaabaa inaad mari karto heerar racfaan oo dheeri ah.

## D3. Caawinta go'aamada caymiska iyo rafcaannada

Waxaad caawimaad waydiisan kartaa mid ka mid ah kuwan soo socda:



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- **Adeegga Macaamiisha** ee lambarada ku yaala xagga hoose ee bogga.
- Wac **Barnaamijka Kaalmada Caymiska Caafimaadka Gobolka (SHIP)** si aad u hesho caawimaad bilaash ah. SHIP waa urur madax banaan. Kuma xidhna qorshahan. Minnesota SHIP waxaa loogu yeeraa Senior LinkAge Line®. Lambarku waa 1-800-333-2433 ama TTY MN Relay 711 ama isticmaal adeegga gudbinta ee aad doorbidayso. Wicitaanadan waa bilaash.
- Wac **Wakiilka Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka La Maareeyo** si aad u hesho caawimaad bilaash ah. Dhexdhexaadiyaha Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee la Maareeyo Dadwaynaha ayaa ka caawiya dadka ka diiwaangashan Caawimada Caafimaadka dhibaatooyinka adeeg ama biilasha. Lambarku waa 651-431-2660 ama 1-800-657-3729 ama TTY MN Relay 711 ama isticmaal adeegga gudbinta ee aad doorbidayso.
- **Dhakhtarkaaga ama adeeg-bixiye kale.** Takhtarkaaga ama bixiye kale ayaa ku weydiin kara go'aanka caymiska ama rafcaan adiga oo ku hadlaya.
- **Saaxiib ama xubin qoys.** Waxaad magacaabi kartaa qof kale oo ku matalo inuu kuu noqdo “wakiil” oo aad weydiisato go'aanka caymiska ama samee racfaan.
- **Qareen.** Waxaad xaq u leedahay qareen, laakiin **lagaagama baahna inaad leedahay qareen** si aad u codsato go'aanka caymiska ama aad racfaan u qaadato.
  - Wac qareenkaaga ama magaca qareenka ka hel ururka qareenada ama adeeg kale oo gudbineed. Kooxaha sharciga qaarkood ayaa ku siin doona adeegyo sharci oo bilaash ah haddii aad u qalanto.

Buuxi foomka ballanta wakiillada haddii aad rabto qareen ama qof kale inuu ku matalo sidii wakiilkaaga. Foomku wuxuu qof siinayaa ogolaansho ah inuu ku matalo.

Ka wac Adeegga Macmiilka ee lambarada ku yaal bogga hoose oo weydii foomka “Ballamaha Wakiilada”. Waxaad sidoo kale heli kartaa foomka adigoo booqanaya <https://www.cms.gov/Medicare/CMS-Forms/CMS-Forms/downloads/cms1696.pdf> ama websaydkeena [ucare.org/formmembers](https://www.ucare.org/formmembers). **Waa inaad na siisaa nuqulka foomka saxeexan.**

#### **D4. Qaybtee ka mid ah cutubkan ayaa ku caawin karta**

Waxaa jira afar xaaladood oo ku lug leh go'aamada caymiska iyo rafcaannada. Xaalad kastaa waxay leedahay xeerar kala duwan iyo waqtiyada kama dambaysta ah. Mid kasta waxaan ku siinnaa faahfaahin qayb gaar ah oo cutubkan ah. Tixraac qaybta khuseysa::

- **Qaybta E,** “Adeegyada daryeelka caafimaadka, caafimaadka habdhaqanka iyo daryeelka muddada-dheer”
- **Qaybta F,** “Daawooyinka Medicare Part D”



**Haddii aad qabto su'aalo,** fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://www.ucare.org).**



- **Qaybta G**, “Naga codsashada inaan daboolno joogitaanka isbitaalka ee muddada dheer”
- **Qaybta H**, “Naga codsashada inaan sii wadno daboolida adeegyada caafimaadka qaarkood” (Qaybtani waxay khusaysaa oo keliya adeegyadan: daryeelka caafimaadka guriga, daryeelka rugta kalkaalinta xirfadlaha ah, iyo adeegyada Xarunta Baxnaaninta Bukaana-socodka ee Dhammaystiran (CORF).)

Haddii aadan hubin qaybta aad isticmaalayso, wac Adeegga Macmiilka ee lambarada ku yaal bogga hoose.

Haddii aad u baahan tahay caawimo ama macluumaad kale, fadlan kala xidhiidh Ombudsperson for Public Care Health Programs 651-431-2660 ama 1-800-657-3729 ama TTY MN Relay 711 ama isticmaal adeega gudbinta ee aad door bidayso.

## E. Adeegyada daryeelka caafimaadka, caafimaadka habdhaqanka iyo daryeelka muddada-dheer

Qaybtani waxa ay sharxaysaa waxa la sameeyo haddii ay dhibaato kaa haysato helitaanka caymiska caafimaadka, ama haddii aad rabto in aannu dib kuugu soo celinno kharashaadka kaaga baxaya daryeelkaaga.

Qaybtani waxay ku saabsan tahay gunnooyinka daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kuwaas oo lagu sifeeyay **Cutubka 4** ee *Member Handbook*. Meelaha qaar, sharciyo kala duwan ayaa laga yaabaa inay khuseeyaan dawada Medicare Part B. Markay sameeyaan, waxaanu sharaxnaa sida sharciyada Medicare Qaybta B ay uga duwan yihiin xeerarka adeegyada caafimaadka iyo alaabta.

### E1. Isticmaalida qaybtan

Qaybtani waxay sharxaysaa waxaad samayn karto mid ka mid ah shanta xaaladood ee soo socda:

1. Waxaad u maleyneysaa inaan daboolayno daryeelka caafimaadka aad u baahan tahay laakiin aadan helin.  
**Maxaad samayn kartaa:** Waxaad na waydiin kartaa inaanu samayno go'aan caymis. Tixraac **Qaybta E2**.
2. Ma aanan oggolaanin daryeelka caafimaadka dhakhtarkaaga ama bixiyaha kale ee daryeelka caafimaadku ay rabaan inay ku siiyaan, waxaadna u malaynaysaa inaan ku siinno.  
**Maxaad samayn kartaa:** Waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankayaga. Tixraac **Qaybta E3**.
3. Waxaad heshay daryeel caafimaad oo aad u malaynayso inaanu bixinayno, laakiin ma bixin doono.  
**Maxaad samayn kartaa:** Waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankayaga ah inaan lacag bixin. Tixraac **Qaybta E5**.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii.  
**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

4. Waxaad heshay oo aad bixisay kharashka daryeelka caafimaadka ee aad moodaysay inaanu bixinayno, oo waxaad doonaysaa inaanu dib kuu soo celinno.

**Maxaad samayn kartaa:** Waxaad na weydiisan kartaa inaan lacag kugu soo celino. Tixraac **Qaybta E5**.

5. Waxaan hoos u dhignay ama joojinay caymiskaaga daryeelka caafimaadka qaarkood, waxaadna u maleyneysaa in go'aankayagu uu wax u dhimi karo caafimaadkaaga.

**Maxaad samayn kartaa:** Waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankayaga ah in la dhimo ama joojiyo daryeelka caafimaadka. Tixraac **Qaybta E4**.

- Haddii caymisku yahay mid loogu talagalay daryeelka isbitaalka, daryeelka caafimaadka guriga, daryeelka rugta kalkaalinta xirfadlaha ah, ama adeegyada CORF, sharciyo gaar ah ayaa khuseeya. Tixraac **Qaybta G** ama **Qaybta H** si aad wax badan u ogaato.
- Dhammaan xaaladaha kale ee ku lug leh dhimista ama joojinta caymiskaaga daryeelka caafimaadka qaarkood, qaybtan (**Qaybta E**) u isticmaal hage ahaan.

## E2. Codsashada go'aanka caymiska

Marka go'aanka caymiska uu ku lug leeyahay daryeelkaaga caafimaad, waxa loo yaqaanaa “**go'aaminta ururada isku dhafan**”

### Adiga, dhakhtarkaaga, ama wakiilkaaga waxaad na waydiisan kartaa go'aanka caynsanaanta:

- Wicitaanka: 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wicitaankan waa bilaash); TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaankan waa bilaash).
- Fakiska: 612-884-2021 ama 1-866-283-8015, Attn: Rafcaannada iyo Cabashooyinka.
- Qorista:

#### **Fiiro gaar ah: Rafcaanka iyo Dacwada**

UCare

PO Box 52

Minneapolis, MN 55440-0052

### Go'aanka caymiska caadiga ah

Marka aan ku siinno go'aankayaga, waxaan isticmaalnaa wakhtiyada kama dambaysta ah ee “caadiga ah” ilaa aan ku heshiino isticmaalka waqtiyada kama dambaysta ah ee “dhakhsaha ah”. Go'aanka caynsanaanta caadiga ah macnaheedu waa inaanu ku siinno jawaab ku saabsan:



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Adeeg caafimaad ama shay 14 maalmood gudahooda ka dib markaan helno codsigaaga.
- Daawooyinka Medicare Part B 72 saacadood gudahood kadib markaan helno codsigaaga.

**Shay ama adeeg caafimaad, waxaanu qaadan karnaa ilaa 14 maalmood oo kale oo taariikh ah** haddii aad codsato wakhti dheeraad ah ama haddii aanu u baahanahay macluumaad dheeraad ah oo ku anfici kara (sida diiwaanada caafimaadka oo laga helo adeeg-bixiyeyaasha shabakada ka baxsan). Haddii aan qaadano maalmo dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno, qoraal ayaan kuugu sheegi doonaa. **Ma qaadan karno maalmo dheeraad ah haddii codsigaagu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B.**

Haddii aad u malaynayso **inaanan** qaadan maalmo dheeraad ah, waxaad samayn kartaa “cabashada degdega ah” ee ku saabsan go'aankayaga ah inaanu qaadano maalmo dheeraad ah. Markaad cabasho degdeg ah samayso, waxaanu ku siinaynaa jawaabta cabashadaada 24 saacadood gudahood. Habraaca cabasho gudbinta waa ka duwan yahay habraaca go'aanada caymiska iyo racfaanada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta cabasho, ay ku jirto cabashada degdegga ah, tixraac **Qaybta J.**

### Go'aanka caymiska degdega ah

Erayga sharciga ah ee “go'aanka caymiska degdega ah” waa  
**“Go'aan degdeg ah.”**

Markaad naga codsato inaan gaarno go'aanka caymiska ee ku saabsan daryeelkaaga caafimaad iyo caafimaadka wuxuu u baahan yahay jawaab degdeg ah, naga codso inaan samayno “go'aan caymis oo degdeg ah.” Go'aanka caynsanaanta degdega ah macnaheedu waa inaanu ku siin doono jawaab ku saabsan:

- Adeegga caafimaadka ama shay 72 saacadood gudahood ka dib markaan helno codsigaaga.
- Daawooyinka Medicare Part B 24 saacadood gudahood kadib markaan helno codsigaaga.

**Shay caafimaad ama adeeg, waxaanu ku qaadan karnaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah** haddii aanu ogaano inuu maqan yahay macluumaad ku anfici kara (sida diiwaannada caafimaadka ee laga helo adeeg-bixiyeyaasha shabakadaha ka baxsan) ama haddii aad u baahan tahay wakhti aad nagu siiso macluumaad u baahan inaan dib u eegis ku samayno. Haddii aan qaadano maalmo dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno, qoraal ayaan kuugu sheegi doonaa. **Ma qaadan karno wakhti dheeraad ah haddii codsigaagu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B.**

Haddii aad u malaynayso **inaanan** qaadan maalmo dheeraad ah si aan u gaarno go'aanka caymiska, waxaad samayn kartaa “cabasho degdeg ah” oo ku saabsan go'aankayaga ah inaan qaadano maalmo dheeraad ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta cabasho, ay ku



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

jirto cabashada degdegga ah, tixraac **Qaybta J**. Waanu ku soo wici doonaa isla marka aanu go'aan gaarno.

Si aad u hesho go'aan caymis degdeg ah, waa inaad buuxisaa laba shuruudood:

- Waxaad codsanaysaa caymiska alaabada caafimaadka iyo/ama adeegyada **aadan helin**. Ma codsan kartid go'aanka caymiska degdega ah ee ku saabsan lacag bixinta alaabta ama adeegyada aad hore u heshay.
- Isticmaalida waqtiyada kama dambaysta ah ee caadiga ah **ay caafimaadkaada u keeni karto dhaawac halis ah** ama ay dhaawici karto awooddaada ah inaad shaqeyso.

**Waxaan si toos ah kuu siinaynaa racfaan degdeg ah haddii dhakhtarkaagu noo sheego in caafimaadkaagu u baahan yahay.** Haddii aad codsato adigoo haysan taageerada dhakhtarkaaga, waxaanu go'aansanaynaa inaad hesho caymis degdeg ah.

- Haddii aan go'aansanno in caafimaadkaagu aanu buuxin shuruudaha go'aanka caymiska degdega ah, waxaanu kuu soo diraynaa warqad sidaas kuu sheegaysa waxaana taa beddelkeeda isticmaalayna wakhtiga kama dambaysta ah ee caadiga ah. Warqaddu waxay kuu sheegaysaa:
  - Waxaan si otomaatig ah ku siinaynaa go'aanka caymiska ee degdega ah haddii dhakhtarkaagu codsado.
  - Sida aad u gudbin karto “cabashada degdega ah” ee ku saabsan go'aankayaga inaanu ku siino go'aanka caymiska caadiga ah bedelkii ay ka ahaan lahayd go'aanka caymiska ee degdega ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta cabasho, ay ku jirto cabashada degdega ah, tixraac **Qaybta J**.

**Haddi aanu diidno qayb ka mid ah ama dhammaan codsigaga,** waxaanu kuu soo diraynaa warqad aan ku sharaxayno sababaha.

- Haddii aan **Diidno**, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. Haddii aad u malaynayso in aanu khalad samaynay, samaynta rafcaanku waa hab rasmi ah oo aad nagu waydiisato in aanu dib u eegno go'aankayaga oo aan bedelno.
- Haddii aad go'aansato inaad racfaan qaadato, waxaad u gudbi doontaa Heerka 1aad ee habraaca rafcaanka (tixraac **Qaybta E3**).

Xaalado xaddidan waxaa laga yaabaa inaan diidno codsigaga go'aanka caymiska, taas oo macnaheedu yahay dib u eegi mayno codsiga. Tusaalooyinka marka codsiga la burin doono waxaa ka mid ah:

- haddii codsigu aanu dhamaystirnayn,
- haddii qof uu kuu sameeyo codsiga laakiin aan si sharci ah loo oggolayn inuu sidaas sameeyo, **ama**



**Haddii aad qabto su'aalo,** fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- haddii aad codsato in codsigaaga laga noqdo.

Haddii aan diidno codsiga go'aanka caymiska, waxaan kuu soo diri doonaa ogeysiis sharaxaya sababta codsiga loo diiday iyo sida loo codsado dib u eegista cayrinta. Dib u eegistaan waxaa lagu magacaabaa racfaan. Rafcaannada waxaa lagu falanqeynayaa qaybta xigta.

### E3. Samaynta Racfaanka Heerka 1aad

**Si aad u bilowdo racfaan**, adiga, dhakhtarkaaga, ama wakiilkaaga waa in ay nala soo xiriiraan. naga soo wac 612-676-6841 or 1-877-523-1517 (wicitaankan waa bilaash). TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wicitaankan waa bilaash) ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash). Waxaad sidoo kale nagala soo xiriiri kartaa qoraal ahaan:

**Attn: Rafcaanka Xubinta iyo Cabashooyinka,**  
UCare  
PO Box 52  
Minneapolis, MN 55440-0052

**Codso racfaan caadi ah ama rafcaan degdeg ah qoraal** ahaan ama adigoo naga soo wacaya lambarka hoose ee bogga.

- Haddii dhakhtarkaaga ama qofka kale ee kuu qoraya daawada ay ku weydiiyaan inay sii wadaan adeeg ama shay aad hore u heshay inta lagu jiro rafcaankaaga, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad wakiilkaaga u magacowdo si uu kuugu matalo.
- Haddii qof kale oo aan ahayn dhakhtarkaagu kuu sameeyo rafcaan, ku dar foomka Magaabista Wakiillada oo u oggolaanaya qofkan inuu ku matalo. Waxaad heli kartaa foomka adigoo booqanaya [www.cms.gov/Medicare/CMS-Forms/CMSForms/downloads/cms1696.pdf](http://www.cms.gov/Medicare/CMS-Forms/CMSForms/downloads/cms1696.pdf) ama websaydkeena oo ah [ucare.org/formembers](http://ucare.org/formembers).
- Waxaan aqbali karnaa codsiga racfaanka foomka la'aantiisa, laakiin ma bilaabi karno ama ma dhamaystiri karno dib u eegistayada ilaa aan ka helno. Haddii aanan helin foomka ka hor waqtiga ugu dambeeya ee aan u qabanay go'aan ka gaarida racfaankaaga:
  - Waanu diidnay codsigaaga, iyo
  - Waxaan kuu soo diraynaa ogeysiis qoraal ah oo sharxaya xaqa aad u leedahay inaad ka codsato IRO inay dib u eegaan go'aankayaga diidmada racfaankaaga.
- Waa in aad racfaan ku codsatid 65 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqadda aan kuu soo dirnay si aan kuugu sheegno go'aankayaga.
- Haddii aad seegto wakhtiga kama dambaysta ah oo aad haysato sabab wanaagsan oo aad ku seegtay wakhtiga, waxa laga yaabaa in aanu ku siino wakhti dheeraad ah oo aad ku samayso racfaankaaga. Tusaalooyinka sababaha wanaagsan waxaa ka mid ah sida inaad qabto jirro halis ah ama inaan ku siinay macluumaad khaldan oo ku saabsan wakhtiga



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

kama dambaysta ah. Sharax sababta rafcaankaagu u daahay markaad racfaanka qaadanayso.

- Waxaad xaq u leedahay inaad naga codsato nuqul bilaash ah oo ah macluumaadka ku saabsan racfaankaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad na weydiisato nuqul bilaash ah oo macluumaadka ku saabsan racfaankaaga.

### **Haddii caafimaadkaagu u baahan yahay, codso racfaan degdeg ah.**

Erayga sharciga ah ee “rafcaan degdeg ah” waa  
**“dib u eegis degdeg ah.”**

- Haddii aad rafcaan ka qaadato go'aanka aanu ka gaarnay caymiska daryeelka aadan helin, adiga iyo/ama dhakhtarkaaga ayaa go'aaminaya haddii aad u baahan tahay rafcaan degdeg ah.

**Waxaan si toos ah ku siinaynaa racfaan degdeg ah haddii dhakhtarkaagu noo sheego in caafimaadkaagu u baahan yahay.** Haddii aad codsato adigoo haysan taageerada dhakhtarkaaga, anaga ayaa go'aaminayna inaad helayso racfaan degdeg ah iyo hadii kale.

- Haddii aan go'aansanno in caafimaadkaagu aanu buuxin shuruudaha rafcaanka degdegga ah, waxaanu kuu soo dirayna warqad sidaas kuu sheegaysa, waxaana taas beddelkeeda isticmaalaynaa wakhtiga kama dambaysta ah ee caadiga ah. Warqaddu waxay kuu sheegaysaa:
  - Waxaan si otomaatig ah kuu siinaynaa rafcaan degdeg ah haddii dhakhtarkaagu naga codsado.
  - Sida aad u gudbin karto “cabashada degdega ah” ee ku saabsan go'aankayaga inaanu ku siino racfaan caadi ah bedelkii aad ka qaadan lahayd rafcaan degdeg ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta cabasho, ay ku jirto cabashada degdega ah, tixraac **Qaybta J**.

**Haddii aan kuu sheegno in aanu joojinayno ama aanu dhimayno adeegyada ama alaabta aad hore u heshay, waxa laga yaabaa in aad sii wadato adeegyadaas ama alaabtaas inta lagu jiro rafcaankaaga.**

- Haddii aan go'aansanno inaan beddelno ama joojinno caymiska adeegga ama shay aad hesho, waxaan kuu soo diraynaa ogeysiin ka hor intaan tallaabo qaadin.
- Haddii aadan ku raacsaneyn go'aankayaga, waxaad gudbin kartaa Racfaan Heerka 1aad.
- Waxaan sii wadeynaa caymiska adeegga ama shayga haddii aad ku codsato Racfaan Heerka 1aad 10 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqaddayada ama taariikhda la doonayo in la dhaqangaliyo ficilka, hadba kii dambeeya.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Haddii aad ka soo baxdo wakhtiga kama dambaysta ah, waxaad heli doontaa adeegga ama shayga iyada oo aan wax isbeddel ah dhicin inta racfaankaaga heerka 1aad la sugayo.
- Waxaad sidoo kale heli doontaa dhammaan adeegyada kale ama alaabta (kuwaas oo aan xiriir la lahayn mawduuca rafcaanka) iyadoon wax isbedel ah lagu samayn.
- Haddii aadan rafcaan qaadanin taariikhdaas ka hor, markaas adeeggaaga ama shayga lama sii wadi doono inta aad sugayso go'aanka racfaanka.

### Waanu tixgelinayna racfaankaaga waxaan ku siinaynaa jawaabtayada.

- Markaan dib u eegno racfaankaaga, waxaan si taxadar leh u eegeynaa dhammaan macluumaadka ku saabsan codsigaaga caymiska daryeelka caafimaadka.
- Waxaan hubinaa haddii aan raacnay dhammaan sharciyada markii aan **Diidnay** codsigaaga.
- Waxaan ururinnaa macluumaad dheeraad ah haddii aan u baahanahay. Waxaa laga yaabaa inaan la xiriirno adiga ama dhakhtarkaaga si aan u helno macluumaad dheeraad ah.

### Waxaa jira waqtiyo kama dambays ah oo racfaan degdeg ah.

- Marka aan isticmaalno waqtiyada kama dambaysta ah ee degdegga ah, waa inaan ku siinaa jawaabtayada **72 saacadood gudahood ka dib markaan helno racfaankaaga**. Waxaan ku siin doonaa jawaabtayada si dhakhso ah haddii caafimaadkaagu nooga baahan yahay.
- Haddii aad codsato waqti dheeraad ah ama haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah oo laga yaabo inay ku anfici karaan, **waxaan qaadan karnaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah** haddii codsigaagu yahay mid la xiriira shay ama adeeg caafimaad.
  - Haddii aan u baahanahay maalmo dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno, qoraal ayaan kuugu sheegaynaa.
  - Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira daawada Medicare Part B, ma qaadan karno wakhti dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno.
  - Haddii aan jawaab ku siin weyno 72 saacadood gudahood ama dhamaadka maalmaha dheeraadka ah ee aan qaadanay, waa inaan codsigaaga u dirno Heerka 2aad ee habraaca rafcaanka. IRO ayaa markaas dib u eegaysa. Qaybta dambe ee cutubkan **Qaybta E4**, waxaanu wax kaaga sheegaynaa ururkan oo aanu sharaxnay habraaca rafcaanka Heerka 2aad. Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska adeega ama shay la xiriira Medical Assistance, waxaad Dhagaysi Cadaalad ah—heerka 2aad ah ka codsan kartaa gobolka laftiisa isla marka uu wakhtigu dhamaado. Minnesota



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

dhexdeeda Dhegeysi cadaalad ah waxa loo yaqaan Racfaan Dawladeed.

- **Haddii aan Oggolaano qaybno ka mid ah ama dhammaan codsigaaga**, waa in aan oggolaanno ama bixinno caymiska aan ku heshiinnay in aan ku bixinno 72 saacadood gudahood ka dib markaan helno racfaankaaga.
- **Haddii aan Diidno qaybno ka mid ah ama dhammaan codsigaaga**, waxaan racfaankaaga u direynaa IRO si loogu helo Racfaan Heerka 2aad.

### Waxaa jira waqtiyo kama dambays ah oo racfaanka caadiga ah.

- Marka aan isticmaalno wakhtiga kama dambaysta ah ee caadiga ah, waa in aan ku siino **jawaabtayada 30 maalmood gudahood** ka dib markii aan helno racfaankaaga caymiska adeegyada aadan helin.
- Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B oo aanad helin, waxaanu ku siinaynaa **jawaabtayada 7 maalmood gudahooda** ka dib markii aanu helno racfaankaaga ama ka dhakhso badan haddii caafimaadkaaga uu sidaas qasbayo.
- Haddii aad codsato waqti dheeraad ah ama haddii aan u baahanahay macluumaad dheeraad ah oo laga yaabo inay ku anfici karaan, **waxaan qaadan karnaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah** haddii codsigaagu yahay mid loogu talagalay shay ama adeeg caafimaad.
  - Haddii aan u baahanahay maalmo dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno, qoraal ayaan kuugu sheegaynaa.
  - Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B, ma qaadan karno wakhti dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno.
  - Haddii aad u malaynayso **inaanan** qaadan maalmo dheeraad ah, waxaad gudbin kartaa cabasho degdeg ah oo ku saabsan go'aankayaga. Markaad gudbiso cabasho degdeg ah, waxaanu ku siinaynaa jawaab 24 saacadood gudahood. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta cabashooyinka, oo ay ku jiraan cabashooyinka degdegga ah, tixraac **Qaybta J**.
  - Haddii aanan ku siin jawaabta ugu dambayn wakhtiga kama dambaysta ah ama dhamaadka maalmaha dheeraadka ah ee aanu qaadanay, waa in aan codsigaaga u dirno Heerka 2aad ee habraaca rafcaanka. IRO ayaa markaa dib u eegaysa. Qaybta dambe ee cutubkan **Qaybta E4**, waxaanu wax kaaga sheegaynaa ururkan oo aanu sharaxnay habraaca rafcaanka Heerka 2aad. Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska adeega ama shay la xiriira Medical Assistance, waxaad Dhagaysi Cadaalad ah—heerka 2aad ah ka codsan kartaa gobolka laftiisa isla marka uu wakhtigu dhamaado. Minnesota dhexdeeda Dhegeysi cadaalad ah waxa loo yaqaan Racfaan Dawladeed.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**



**Haddii aan Oggolaano qaybno ka mid ah ama dhammaan codsigaaga**, waa in aan oggolaano ama bixinno caymiska aan ku heshiinnay in aan ku bixinno 30 maalmood gudahood, ama **7 maalmood gudahooda** haddii codsigaga uu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B, ka dib markii aan helno racfaankaaga.

Haddii aan **Diidno** qayb ka mid ah ama dhammaan codsigaaga, **waxaad leedahay xuquuqo rafcaan oo dheeraad ah:**

- Haddii aan Diidno qayb ka mid ah **ama** dhammaan waxa aad codsatay, waxaanu kuu soo diraynaa warqad.
- Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska adeegga ama shay Medicare ah, warqaddu waxay kuu sheegaysaa inaan kiiskaaga u dirnay IRO ee Racfaanka Heerka 2aad.
- Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay caymiska adeegga ama shay Medical ah, warqaddu waxay kuu sheegaysaa sida loo xareeyo Racfaanka Heerka 2aad.

#### **E4. Samaynta Racfaanka Heerka 2aad**

Haddii aan ku nidhaahno **Maya** qayb ama dhammaan Racfaanka Heerka 1, waxaanu kuu soo dirnay warqad. Warqadani waxay kuu sheegaysaa haddii Medicare, Assistance Medical Assistance, ama labadaba barnaamijyadu ay inta badan daboolaan adeegga ama shayga.

- Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay adeeg ama shay uu inta badan caymiska Medicare daboolo, waxaanu si otomaatig ah kiiskaaga ugu diraynaa Heerka 2aad ee habraaca rafcaanka isla marka uu Racfaanka Heerka 1aad dhamaado.
- Haddii dhibatadaadu ku saabsan tahay adeeg ama shay caymiska Medical Assistance inta badan daboolo, waxaad adigu gudbin kartaa Racfaanka Heerka 2aad. Warqaddu waxay kuu sheegaysaa sida tan loo sameeyo. Waxaan sidoo kale macluumaad dheeraad ah ku daraynaa cutubkan goor dambe.
- Haddii dhibatadaadu ku saabsan tahay adeeg ama shay ay **Medicare iyo Medical Assistance labaduba** daboolaan, waxaad si otomaatig ah Racfaanka Heerka 2aad uga heli doontaa IRO. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa Dhageysi cadaalad ah gobolka.

Haddii aad u qalanto sii wadida gunnooyinka markii aad gudbisay Racfaanka Heerka 1aad, gunnooyinkaaga adeega, shayga ama dawada ee rafcaanku ku socdo waxay sidoo kale sii socon karaan inta lagu jiro Heerka 2aad. Tixraac **Qaybta E3** si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sii wadida gunnooyinka inta lagu jiro Racfaanka Heerka 1aad.

- Haddii dhibatadaadu ay ku saabsan tahay adeeg uu inta badan daboolo Medicare, gunnooyinka adeegaas ma sii socon doonaan inta lagu jiro habraaca rafcaanka Heerka 2aad ee IRO.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Haddii dhibatadaadu ku saabsan tahay adeeg sida caadiga ah u daboolo kaliya Medical Assistance, gunnooyinka adeegaas way sii soconayaan haddii aad Racfaanka Heerka 2aad ku soo gudbiso 10 maalmood gudahood ka dib markaad hesho warqadda go'aankayaga.

### **Marka dhibkaagu uu ku saabsan yahay adeeg ama shay Medicare inta badan daboolo**

IRO ayaa dib u eegeysa racfaankaaga. Waa urur madax banaan oo ay shaqaaleysato Medicare.

Magaca rasmiga ah ee “Ururka Dib-u-eegista Madaxabannaan” (IRO) waa “**Hay'adda Dib-u-eegista Madax-bannaan**”, oo mararka qaarkood loo yaqaano “**IRE**”.

- Ururkani naguma xirna mana aha hay'ad dawladeed. Medicare waxay shirkadda u dooratay inay noqoto IRO, oo Medicare ayaa kormeerta shaqadooda.
- Waxaan macluumaadka ku saabsan racfaankaaga (“galka kiiskaaga”) u dirnaa ururkan. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho koobi bilaash ah oo ah galka kiiskaaga.
- Waxaad xaq u leedahay inaad IRO siiso macluumaad dheeraad ah si uu u taageero racfaankaaga.
- Dib-u-eegiyaasha IRO waxay si taxadar leh u eegaan dhammaan macluumaadka la xiriira racfaankaaga.

### **Haddii aad rafcaan degdeg ah ku lahayd Heerka 1aad, waxaad sidoo kale rafcaan degdeg ah ku leedahay Heerka 2aad.**

- Haddii aad rafcaan degdeg ah naga soo qaadatay heerka 1aad, waxaad si otomaatig ah u helaysaa rafcaan degdeg ah Heerka 2aad. IRO waa inay ku siiso jawaabta Rafcaankaaga **Heerka 2aad 72 saacadood** gudahood marka aad hesho racfaankaaga.
- Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira shay ama adeeg caafimaad oo ay IRO u baahan tahay inay uruuriso macluumaad dheeraad ah oo ku anfici kara, **waxay qaadan kartaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah**. IRO ma qaadan karto waqti dheeraad ah si ay go'aan uga gaarto haddii codsigaga uu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B.

### **Haddii aad rafcaan caadi ah ku lahayd heerka 1aad, waxaad sidoo kale rafcaan caadi ah ku leedahay Heerka 2aad.**

- Haddii aad naga qaadatay rafcaan caadiga ah heerka 1aad, waxaad si otomaatig ah u heli doontaa racfaan caadi ah xilliga heerka 2aad.
- Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira shay ama adeeg caafimaad, IRO waa inay ku siiso jawaabta Rafcaankaaga Heerka 2aad **30 maalmood gudahooda** marka aad hesho racfaankaaga.



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B, IRO waa inay ku siiso jawaabta Racfaanka Heerka 2aad **7 maalmood gudahooda** marka aad hesho racfaankaaga.
- Haddii codsigaagu yahay mid la xiriira shay ama adeeg caafimaad oo ay IRO u baahan tahay inay uruuriso macluumaad dheeraad ah oo ku anfici kara, **waxay qaadan kartaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah**. IRO ma qaadan karto waqti dheeraad ah si ay go'aan uga gaarto haddii codsigaga uu yahay mid la xiriira daawooyinka Medicare Part B.

IRO waxay ku siinaysaa jawaabtooda qoraal waxayna sharxayaan sababaha.

- Haddii IRO ay Oggolaato qayb ka mid ah ama dhammaan codsiga shay ama adeeg caafimaad, waa inaan:
  - Oggolaanaa caymiska daryeelka caafimaadka **72 saacadood gudahood, ama**
  - Bixinaa adeega **14 maalmood gudahooda** ka dib markaan helno go'aanka IRO **codsiyada caadiga ah, ama**
  - Bixinaa adeega **72 saacadood** gudahooda laga bilaabo taariikhda aan helno go'aanka IRO **codsiyada degdega ah.**
- Haddii IRO ay Oggolaato qayb ka mid ah ama dhammaan codsiga daawada Medicare Part B, waa in aan ogolaano ama bixinaa daawada Medicare Part B uu muranku ka taagan yahay:
  - **72 saacadood gudahood** kadib markaan helno go'aanka IRO ee **codsiyada caadiga ah, ama**
  - **24 saac gudahooda** laga bilaabo taariikhda aan helno go'aanka IRO ee **codsiyada degdegga ah.**
- Haddii IRO ay Diido qayb ka mid ah ama dhammaan rafcaankaaga, waxay ka dhigan tahay inay ogolaadeen inaan ansixin codsigaaga (ama qayb ka mid ah codsigaaga) caymiska daryeelka caafimaadka. Tani waxaa loo yaqaanaa “in la taageero go'aanka” ama “diiditaanka racfaankaaga.”
  - Haddii kiiskaagu buuxiyo shuruudaha, waxaad dooranaysaa inaad rabto inaad sii wado oo aad heer kale u gudbiso racfaankaaga.
  - Waxaa jira saddex heer oo dheeraad ah oo ku jira habraaca rafcaanka ka dib Heerka 2aad, wadar ahaan shan heer.
  - Haddii Racfaanka Heerka 2aad la diido oo aad buuxiso shuruudaha si aad u sii wadato habraaca rafcaanka, waa inaad go'aansataa inaad u gudubto heerka 3aad oo aad



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

samayso rafcaan saddexaad. Faahfaahinta ku saabsan sida sidaan loo sameeyo waxay ku jirtaa ogeysiiska qoran ee aad helayso ka dib Racfaanka Heerka 2aad.

- Garsoore Maamulka Sharciga (ALJ) ama garyaqaan garsoore ayaa qabanaya Racfaanka Heerka 3aad. Tixraac **Qaybta I** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Racfaanada Heerka 3aad, 4aad, iyo 5aad.

### **Marka dhibkaagu uu ku saabsan yahay adeeg ama shay Caawimaada Caafimaadku inta badan daboosho, ama ay daboolaan labada Medicare iyo Assistance Medical**

Racfaanka Heerka 2aad ee adeegyada Caawimada Caafimaadku inta badan daboosho waa Dhagaysi Cadaalad ah oo lala yeesho gobolka. Minnesota dhexdeeda Dhegeysi cadaalad ah waxa loo yaqaan Racfaan Dawladeed. Waa inaad Dhageysi cadaalad ah ku codsataa qoraal ama taleefan **120 maalmood** gudahooda laga bilaabo taariikhda aan kuu soo dirnay warqadda go'aanka ee Racfaanka Heerka 1aad. Warqadda aad naga heshay ayaa kuu sheegaysa meesha aad ka gudbinayso codsigaaga Dhagaysiga Cadaaladda ah.

Waa inaad ku codsataa Rafcaan Gobol 120 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka rafcaanka ee qorshaha.

Boostada, fakiska, ama u gudbi codsigaaga qoran:

Xafiiska Racfaanka ee Waaxda Adeegyada  
Aadanaha ee Minnesota  
PO Box 64941  
St. Paul, MN 55164-0941  
Fakis: 651-431-7523

Foomka Racfaanka onlaynka ah:

[edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-0033-ENG](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-0033-ENG)

Garsooraha Adeegga Aadanaha ee Xafiiska Racfaanka Gobolka ayaa qaban doona dhegeysiga. Kulankaagu wuxuu ahaan doonaa mid telefoon haddii aadan codsan kulan fool ka fool ah. Inta lagu jiro dhagaysigaaga, u sheeg xaakimka sababta aad u khilaafsan tahay go'aanka qorshuhu gaadhay. Waxaad weydiisan kartaa saaxiib, qaraabo, u doode, bixiye, ama qareen inuu ku caawiyo.

Nidaamku wuxuu qaadan karaa inta u dhaxaysa 30 iyo 90 maalmood. Haddii dhegeysigaagu uu ku saabsan yahay adeeg si degdeg ah loogu baahan yahay oo aad u baahan tahay jawaab degdeg ah, u sheeg Xafiiska Racfaanka Gobolka marka aad xerayso codsigaaga dhegeysiga. Haddii dhegeysigaagu uu ku saabsan yahay diidmada daruuriga ah ee caafimaadka, waxaad waydiisan kartaa ra'yi caafimaad khabiir caafimaad oo madaxbanaan. Wax kharash ah oo kugu kacaya ma jiro.

Haddii aad u baahan tahay caawimo mar kasta oo hawsha ka mid ah, wac Wakiilka



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](https://www.ucare.org).**

Barnaamijyada Caafimaadka Daryeelka Dadweynaha 651-431-2660 ama 1-800-657-3729 ama TTY MN Relay 711 ama isticmaal adeega gudbinta ee aad door bidayso.

Xafiiska Dhageysiga Cadaalada ayaa ku siinaya go'aankooda qoraal wuxuuna sharaxayaa sababaha.

- Haddii xafiiska dhageysiga cadaalada uu **Oggolaado** qayb ka mid ah ama dhammaan codsiga ku aadan shay ama adeeg caafimaad, waa in aan kuu ansixino ama ku bixinaa adeega ama shayga **72 saacadood gudahood** ka dib markaan helno go'aankooda.
- Haddii xafiiska dhageysiga cadaalada uu **Diido** qayb ka mid a ama dhammaan rafcaankaaga, waxay la macno tahay inay ogolaadeen inaan ansixin codsigaaga (ama qayb ka mid ah codsigaaga) caymiska daryeelka caafimaadka. Tani waxaa loo yaqaanaa “in la taageero go'aanka” ama “diiditaanka racfaankaaga.”

Haddii go'aanka xafiiska IRO ama dacwad cadaalad ah uu yahay **Maya** dhammaan ama qayb ka mid ah codsigaaga, waxaad leedahay xuquuq rafcaan oo dheeraad ah.

Haddii Racfaankaaga heerka 2aad u gudbo **IRO**, waxaad mar kale racfaan ka qaadan kartaa kaliya haddii qiimaha dollarka ee adeega ama shayga aad rabto uu gaaro qadarka ugu yar. Garsooraha ALJ ama qareenka ayaa gacanta ku haya Racfaanka Heerka 3aad. **Warqadda aad ka heshay IRO waxay sharraxaysaa xuquuqaha rafcaanka ee dheeraadka ah ee aad yeelan karto.**

Warqadda aad ka heshay xafiiska Dhegeysi cadaalad ah ayaa qeexaysa doorashada rafcaanka xigta.

Tixraac **Qaybta I** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahaaga racfaanka ka dib Heerka 2aad.

## E5. Dhibaatooyinka lacag-bixinta

Ma ogolaanayno in bixiyayaasha shabakadayadu kugu soo dallacaan adeegyada iyo alaabta ku jirta caymiska. Tani waa run xitaa haddii aan siino bixiyaha wax ka yar kharashka bixiyaha adeeg ama shay la daboolay. Marna lagaagama baahna inaad bixiso hadhaaga biilna.

**Si toos ah kuuguma soo celin karno adeegga Caawinta Caafimaadka ama shay.** Haddii aad hesho biil ku aadan adeegyada iyo alaabta la daboolay Medical Assistance, noo soo dir biilka. Waa inaad adigu iska bixin biilka. Waxaan si toos ah ula xiriiri doonaa bixiyaha waxaan xalin doonaa dhibaataada. Haddii aad bixiso biilka, waxaad ka heli kartaa lacag celin bixiyaha xanaanada caafimaadka haddii aad raacdo sharciyada helitaanka adeegyada ama alaabta.

Haddii aad rabto in aan kugu soo celino kharashka adeeg ama shay uu daboolay caymiska **Medicare** ama aad naga codsanayso in aan bixino kharashka bixiyaha daryeelka caafimaadka ee adeeg ama



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

shay uu daboolay caymiska Medical Assistance, waxa aad naga codsan doontaa in aan gaarno go'aanka caymiska. Waxaan eegi doonaa haddii adeegga ama shayga aad kharashkiisa bixisay uu yahay mid la daboolay iyo haddii aad raacday dhammaan sharciyada isticmaalka caymiskaaga. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah, tixraac **Cutubka 7 ee Member Handbook**.

- Haddii adeega ama shayga aad kharashkiisa bixisay la daboolo oo aad raacday sharciyada oo dhan, waxaanu adeeg-bixiyahaaga u soo diri doonaa lacagta adeega ama shayga 30 maalmood gudahooda, laakiin aan ka dambayn 60 maalmood kadib markaan helno codsigaaga. Adeeg-bixiyahaaga ayaa markaas kuu soo diri doona lacagta.
- Haddii aadan weli bixin kharashka adeegga ama shayga, waxaan si toos ah lacagta ugu diri doonaa adeeg-bixiyaha. Marka aan dirno lacag bixinta, waxay la mid tahay inaan **Oggolaanay** codsigaaga go'aanka caymiska.
- Haddii adeegga ama shayga aan la daboolin ama aadan raacin dhammaan sharciyada, waxaan kuu soo diri doonaa warqad kuu sheegaysa inaan bixin doonin kharashka adeegga ama shayga anagoo kuu sharraxeyna sababta.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aankayaga ah inaan lacag bixin, **waxaad samayn kartaa racfaan**. Raac habraaca racfaanka ee lagu qeexay **Qaybta E3**. Markaad raacdo tilmaamahan, ogow:

- Haddii aad rafcaan naga qaadato si aanu lacag kuugu soo celino, waa inaanu jawaabtayada ku siino 30 maalmood gudahooda ka dib markaan helno racfaankaaga.
- Haddii aad naga codsato inaan dib kuugu soo celino kharashka daryeel caafimaad oo aad adigu kharashkiisa iska bixisay, ma codsan kartid racfaan degdeg ah.

Haddii jawaabtayada racfaanka ay tahay **Maya** oo **Medicare** ay inta badan dabooosho adeegga ama shayga, waxaan kiiskaaga u diri doonaa IRO. Waxaan kuu soo diri doonaa warqad haddii tani ay dhacdo.

- Haddii IRO ay ka noqoto go'aankayaga oo ay tiraahdo inaan ku siino kharashka, waa inaan lacagta kuu soo dirnaa adiga ama adeeg-bixiyaha 30 maalmood gudahood. Haddii jawaabta racfaankaadu tahay **Haa** marxalad kasta oo ka mid ah habraaca rafcaanka ka dib Heerka 2aad, waa in aan kuu soo dirno lacagta adiga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka 60 maalmood gudahood.
- Haddii IRO ay **Diido** racfaankaaga, waxay la macno tahay inay ogolaadeen inaan ansixinin codsigaaga. Tani waxaa loo yaqaanaa “in la taageero go'aanka” ama “diiditaanka racfaankaaga.” Waxaad heli doontaa warqad sharaxaysa xuquuqaha rafcaanka ee dheeraadka ah ee aad yeelan karto. Tixraac **Qaybta I ee Member Handbook** si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan heerarka rafcaanka ee dheeraadka ah.

Haddii jawaabtayada racfaanka ay tahay **Maya** oo Medical Assistance ay inta badan dabooosho



**Haddii aad qabto su'aalo**, fadlan UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

adeegga ama shayga, waxaad adigu gudbisan kartaa Racfaan Heerka 2aad. Tixraac **Qaybta E4** ee *Member Handbook* si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

## F. Daawooyinka loo qoro Medicare Part D

Faa'iidooyinkaaga xubin ahaan qorshahayaga waxa ka mid ah caymiska dawooyinka dhakhtarku qoray oo badan. Inta badan kuwan waa daawooyinka Medicare Qaybta D. Waxaa jira dhowr daawo oo Medicare Qaybta D aysan daboolin kaalmada Caafimaadku dabooli karto. **Qaybtan waxay khusaysaa oo keliya rafcaannada daawooyinka Medicare Part D.**

Qaybtan inteeda kale waxaynu ku odhan doonaa “dawo” halkii aad odhan lahayd “Medicare Part D daroogada” mar kasta. Daawooyinka uu daboolo caymiska Medical Assistance oo kaliya raac habraaca **Qaybta D.**

Si loo daboolo, daawada waa in loo isticmaalo tilmaam caafimaad ahaan la aqbalay. Taas macnaheedu waxa weeye in dawada ay ogolaatay Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA) ama ay taageerto tixraacyo caafimaad qaarkood. Tixraac **Cutubka 5** ee *Member Handbook* si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan calaamad caafimaad ahaan la aqbalay.

### F1. Go'aamada caymiska iyo rafcaannada Medicare Part D

Waa kuwan tusaalooyin ku saabsan go'aamada caynsanaanta ee aad na weydiisato inaan ka gaadhno daawooyinkaaga Medicare Qaybta D:

- Waxaad naga codsan kartaa inaan samayno ka-dhaafitaan, oo ay ku jirto inaad na waydiisato inaan:
  - daboolno daawo ku jira Medicare Part D oo aan ku jirin *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ee qorshaheena
  - meel iska dhigno xaddidaada caymiskayaga dawada (sida xaddidaada caddadka aad heli karto)
- Waxaad naga codsan kartaa haddii dawo laguugu daboolay caymiska (sida marka ay dawadaadu ku jirto *Drug List (Liiska Dawooyinka)* ee qorshaheena laakiin waa inaan kuu ogolaano ka hor intaan daboolin).

**FIIRO GAAR AH:** IHaddii farmashiyahaagu kuu sheego in dawadaada aan loo buuxin karin si qoraal ah, farmashiyuhu wuxuu ku siinayaa ogeysiis qoran oo sharxaya sida aad nala soo xidhiidho si aad u codsato go'aanka caymiska.

Go'aanka caymiska bilowga ah ee ku saabsan  
daawooyinka Medicare Part D waxaa loo yaqaanaa  
“go'aaminta caymiska”

?

**Haddii aad qabto su'aalo,** tadii UCare Connect + Medicare ka wac 612-676-3310 ama 1-855-260-9707 (wacitaanku waa bilaash), TTY 612-676-6810 ama 1-800-688-2534 (wacitaankan waa bilaash), 8 subaxnimo – 8 fiidnimo, todobo maalmood todobaadkii. **Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [ucare.org](http://ucare.org).**

- Waxaad naga codsan kartaa inaan bixinno kharashka dawo aad hore u iibsaday. Tani waa waydiinta go'aan caymis oo ku saabsan lacag-bixinta.

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka caynsanaanta ee aanu samaynay, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankayaga. Qaybtani waxay kuu sheegaysaa sida loo waydiiyo go'amada caymiska iyo sida loo qaato racfaan. Isticmaal shaxda hoose si aad caawimaad uga hesho.

<b>Xaaladahan kee baad ku sugan tahay?</b>			
